Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 12aad** **Muqdisho, 17 AUGUST 2025** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## MARCH-JULY

# 2025

**SHARCI LR.39** **TAARIIKH: 11-DA MAAJO 2025**

**SHARCIGA SHIRKADAHA CEYMISKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0721/B11/25**, ku taariikheysan **11/05/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindise Sharciyeedka Shirkadaha Ceymiska. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Shirkadaha Ceymiska.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 JUL 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Saalihi
SAACAD ____ SAXIIX ____

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-050-2025
TAARIIKH: 09-09-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**WASAARADDA MAALIYADDA**

# HINDISE-SHARCIYEEDKA SHIRKADAHA CAYMISKA

*Waxaa diyaariyay Wasaaradda Maaliyadda Xukuumadda JFS, 2023*

## Table of Contents


*HINDISE-SHARCIYEEDKA SHIRKADAHA CAYMISKA* ........ *1*

*CUTUBKA KOWAAD* ........ *13*

*QODOBADA HORDHACA AH* ........ *13*

Qodobka 1aad ........ 13

Magaca Sharciga ........ 13

Qodobka 2aad ........ 13

Ujeeddooyinka ........ 13

Qodobka 3aad ........ 13

Eray-bixinno ........ 13

Qodobka 4aad ........ 18

Baaxadda Sharciga ........ 18

Qodobka 5aad ........ 18

Shahaadada Caymiska ee Reeban ........ 18

Qodobka 6aad ........ 18

Mabaadi'da Guud ee Caymiska ........ 18

*CUTUBKA LABAAD* ........ *19*

*MAAMULKA SHARCIYEYNTA IYO KORMEERKA* ........ *19*

Qodobka 7aad ........ 19

Awoodda Rukhsadda Sharciyeynta iyo Kormeerk ........ 19

Qodobka 8aad ........ 19

Sharciyada iyo Ujeeddooyinka Kormeerka ee Bankiga ........ 19

Qodobka 9aad ........ 19

Awoodaha iyo Xilalka Guud ee Bankiga ........ 19

Qodobka 10aad ........ 20

Awoodaha Kormeerka iyo Hanti-dhawrka ........ 20

Qodobka 11aad ........ 22

Kormeerka ........ 22

Qodobka 12aad ........ 22

Guddiga Sare ee Shareecada ........ 22

Qodobka 13aad ........ 23

Waajibaadka Golaha Sare ee Shareecada ........ 23

Qodobka 14aad ........ 24

Xeerka Habsami-maamulka ........ 24

Qodobka 15aad....24
Wadajirka Kormeerka....24
*CUTUBKA SADEXAAD*....*24*
*HAB DHAQANKA HAWLAHA CAYMISKA AH*....*24*
Qodobka 16aad....24
Isticmaalka Erayga Caymiska/Takaaful....24
Qodobka 17aad....25
Sameynta iyo Maamulidda Sanduuqyada....25
Qodobka 18aad....26
Shuruudaha Hantida Sanduuqa Caymiska....26
Qodobka 19aad....26
Hagaajinta Xisaabaadka....26
Qodobka 20aad....26
Diiwan-gelin Shahaadooyin Caymis....26
Qodobka 21aad....27
Ka-noqosho Shahaadooyin....27
Qodobka 22aad....27
Warbixin Maaliyadeed....27
Qodobka 23aad....28
Warbixin Gaar ah ee Caymis....28
Qodobka 24aad....28
Akjuweeriga hawlaha Caymiska....28
Qodobka 25aad....29
Heerarka Akjuweeriyada Dhabta ah....29
Qodobka 26aad....29
Qaabeynta Dib-u-caymiska....29
Qodobka 27aad....30
Xakamaynta Isbeddelka....30
Qodobka 28aad....30
Awoodaha Kormeerka....30
Qodobka 29aad....30
Warbixinta Kormeerka....30
Qodobka 30aad....31
Waajibaadka Dheeraadka ah iyo Dhaqanka Suuqa....31

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

*CUTUBKA AFARAAD* ........ 31

*SHATI-SIINTA* ........ 31

Qodobka 31aad ........ 31

Shati-siin Shirkad Caymis ........ 31

Qodobka 32aad ........ 32

Xaq-u-yeelashada Codsadaha ........ 32

Qodobka 33aad ........ 32

Debaajiga Bankiga Dhexe ........ 32

Qodobka 34aad ........ 32

Shati Gaar ah ........ 32

Qodobka 35aad ........ 32

Habka Shati-siinta ........ 32

Qodobka 36aad ........ 33

Go'aanka Bankiga ........ 33

Qodobka 37aad ........ 33

Muddada Shatiga ........ 33

Qodobka 38aad ........ 34

Xafiiska Maamulka ........ 34

Qodobka 39aad ........ 34

Diiwan-gelin Shirkad Caymis ........ 34

Qodobka 40aad ........ 34

Laalis iyo Rukhsad Kala Noqosho ........ 34

Qodobka 41aad ........ 35

Joojin Shati ........ 35

Qodobka 42aad ........ 36

Shati-siinta Shirkadaha Ajaanibka ah ........ 36

Qodobka 43aad ........ 36

Wakiillo Shirkad Caymis Shisheeye ........ 36

Qodobka 44aad ........ 36

Laamaha Shirkadaha Caymiska ........ 36

Qodobka 45aad ........ 37

Wakiil Sharci ........ 37

*CUTUBKA SHANAAD* ........ 37

*RUKHSAD-SIINTA IYO KORMEERKA DHEX-DHEXAADIYEYAASHA* ........ 37

Qodobka 46aad....................37
Dhex-dhexaadiyeyaasha....................37
Qodobka 47aad....................38
Rukhsad-siin dhex-dhexaadiyeyaal....................38
Qodobka 48aad....................38
Jiritaanka Shatiga....................38
Qodobka 49aad....................38
Diiwan-gelin Dhex-dhexaadiye....................38
Qodobka 50aad....................38
Magacaabista Shaqaalaha Muhiimka ah....................38
Qodobka 51aad....................39
Xakameynta kale....................39
Qodobka 52aad....................39
Warbixinta Maaliyadeed ee Dhex-dhexaadiyayaasha....................39
Qodobka 53aad....................39
Ilaalinta Xisaabaadka Dhex-dhexaadiyayaasha....................39
Qodobka 54aad....................40
Banka-takaful....................40
Qodobka 55aad....................40
Awooda Kormeerka....................40
*CUTUBKA LIXAAD....................40*
*MAAMULKA HAWLAHA TAAKAFUL....................40*
Qodobka 56aad....................40
Maamulka iyo Qaab-dhismeedka Shirkadda Caymiska....................40
Qodobka 57aad....................41
Doorka iyo Shaqada Golaha Maamulka....................41
Qodobka 58aad....................41
Madaxa Fulinta iyo Ku-xigeennada....................41
Qodobka 59aad....................41
Hanti-dhawraha Dibadda....................41
Qodobka 60aad....................42
Saxiix Akjuweeri....................42
Qodobka 61aad....................42
Qoritaan iyo Joojin Shaqaale....................42

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 62aad ......... 42
Qodobbada Asaasiga ah ee Shirkadda ......... 42
Qodobka 63aad ......... 42
Guddiga Shareecada ......... 42
Qodobka 64aad ......... 43
Shuruudaha Xubinta Guddida Shareecada ......... 43
Qodobka 65aad ......... 43
Diidmada Magacaabista iyo Joojinta Xubinta Guddiga Shareecada ......... 43
Qodobka 66aad ......... 44
Xaddidaada Xubinimada Guddiga Shareecada ......... 44
Qodobka 67aad ......... 44
Waajibaadka Guddiga Shareecada ......... 44
Qodobka 68aad ......... 45
Madax-bannaanida Guddiga Shareecada ......... 45
Qodobka 69aad ......... 45
Oggolaanshaha Guddiga Shareecada ......... 45
Qodobka 70aad ......... 45
Sarkaalka Ku-dhaqanka Shareecada ......... 45
Qodobka 71aad ......... 46
Hanti-dhawraha Shareecada Ka Madax-bannaan Shirkadaha ......... 46
Qodobka 72aad ......... 46
Dhaqan-gelinta Hannaanka Shareecada ......... 46
Qodobka 73aad ......... 47
Wareejinta, Isku-dhafka iyo La-wareegidda Ganacsiga Caymiska ......... 47
*CUTUBKA TODOBAAD* ......... *47*
*NOOCYADA CAYMISKAKA* ......... *47*
Qodobka 74aad ......... 47
Noocyada Caymiska ......... 47
Qodobka 75aad ......... 47
Qaababka Hawl-gelinta Caymiska ......... 47
*CUTUBKA SIDDEEDAAD* ......... *48*
*DHAQAALAHA CAYMISKA/TAKAAFULKA* ......... *48*
Qodobka 76aad ......... 48
Sanduuqa Saamileyda ......... 48

Qodabka 77aad ........................................................ 49
Qaadashada Waajibaadka ........................................................ 49
Qodobka 78aad ........................................................ 49
Sanduuqa Caymiska ee ka Qeyb-galayaasha ........................................................ 49
Qodobka 79aad ........................................................ 50
Go'aaminta Kharashka Shirkadda Caymiska ........................................................ 50
Qodobka 80aad ........................................................ 50
Sanduuqa Magdhawga Caymiska ........................................................ 50
Qodobka 81aad ........................................................ 51
Soo-gelitaanka Dakhliga Sanduuqa Magdhawga Caymiska ........................................................ 51
Qodobka 82aad ........................................................ 51
Bixinta Magdhawga Caymiska ........................................................ 51
Qodobka 83aad ........................................................ 51
Keydka Sanduuqa Cayminta ........................................................ 51
Qodobka 84aad ........................................................ 52
Hantida Sanduuqa magdhawga Caymiska ........................................................ 52
Qodobka 85aad ........................................................ 52
Sanduuqa Maal-gelinta ee Caymiska ........................................................ 52
*CUTUBKA SAGAALAAD* ........................................................ *52*
*QEYBINTA DHEERAADKA KHAASKA AH* ........................................................ *52*
Qodobka 86aad ........................................................ 52
Shuruucda Maareynta Dakhliga Dheeraadka Khaaska ah ........................................................ 52
Qodobka 87aad ........................................................ 53
Xeerarka Qeybinta Dheeraadka ........................................................ 53
Qodobka 88aad ........................................................ 53
Ra'yiga Akjuweeriga ........................................................ 53
*CUTUBKA TOBNAAD* ........................................................ *54*
*QARD-XASAN (DEEN WANAAGSAN)* ........................................................ *54*
Qodobka 89aad ........................................................ 54
Adeegga Qard-xasan (Deen Wanaagsan) ........................................................ 54
Qodobka 90aad ........................................................ 54
Xaaladaha Qard-xasan ........................................................ 54
Qodobka 91aad ........................................................ 55
Dib-u-bixinta Qard-xasan ........................................................ 55

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

*CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD* ........ *55*
*ADEEGYADA CAYMISKA* ........ *55*
Qodobka 92aad........ 55
Adeeg Caymis oo Cusub ........ 55
Qodobka 93aad ........ 56
Mas'uuliyadda Shirkadda Caymiska ee Adeegyada Cusub ........ 56
Qodobka 94aad ........ 56
Maareynta Khatarta Adeegyada Caymiska........ 56
Qodobka 95aad ........ 57
Amniga iyo Hufnaanta Nidaamyada........ 57
Qodobka 96aad ........ 57
Hab-raaca Kor-joogteynta........ 57
*CUTUBKA LABO IYO TOBNAAD*........ *57*
*HESHIISYADA CAYMISKA*........ *57*
Qodobka 97aad........ 58
Heshiisyada Caymiska ........ 58
Qodobka 98aad........ 58
Qaadashada Heshiiska Caymiska........ 58
Qodobka 99aad ........ 58
Cusbooneysiinta iyo Kordhinta Heshiiska Caymiska ........ 58
Qodobka 100aad........ 58
Nuxurka Heshiiska Caymiska........ 58
Qodobka 101aad........ 59
Caymiska Waajibka ah ........ 59
Qodobka 102aad........ 59
Qaaraanka ama tabarucaadda ........ 59
*CUTUBKA SADEX IYO TOBNAAD*........ *60*
*WAAJIBAADKA SHIRKADAHA CAYMISKA*........ *60*
Qodobka 103aad........ 60
Mabaadi'da Maal-gelinta ........ 60
Qodobka 104aad........ 61
Shaacin Guud ........ 61
Qodobka 105aad........ 61
Hawlo Reebban........ 61

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 106aad ........................................................ 62
Diidmo Khatar ........................................................ 62
Qodobka 107aad ........................................................ 62
Joojin Adeegyo Caymis ........................................................ 62
Qodobka 108aad ........................................................ 62
Ku-filanaansho Hanti Shirkad ........................................................ 62
Qodobka 109aad ........................................................ 63
Dib-u-caymis ........................................................ 63
Qodobka 110aad ........................................................ 63
Keydin Diiwaan-gelin ........................................................ 63
Qodobka 111aad ........................................................ 63
Khidmad Kormeer ........................................................ 63
Qodobka 112aad ........................................................ 63
Celinta Shahaadada Heshiiska ........................................................ 63
*CUTUBKA AFAR IYO TOBNAAD ........................................................ 64*
*NUQSAANTA LACAGTA IYO HABEYNTA KHASAARAHA ........................................................ 64*
Qodobka 113aad ........................................................ 64
Sheega-shooyin ........................................................ 64
Qodobka 114aad ........................................................ 65
Sheegasho iyo Dokumentiyo Been ah ........................................................ 65
Qodobka 115aad ........................................................ 65
Arimaha Waajibaadka ah ee hoos u dhaca Sanduuqa Magdhawga Caymiska ........................................................ 65
*CUTUBKA SHAN IYO TOBNAAD ........................................................ 65*
*HANTI-DHAWRKA IYO SAXIIXAHA AKJUWEERIGA ........................................................ 65*
Qodobka 116aad ........................................................ 65
Warbixin Hanti-dhawr ........................................................ 65
Qodobka 117aad ........................................................ 66
Doorka Saxiixaha Akjuweeriga ........................................................ 66
*CUTUBKA LIX IYO TOBNAAD ........................................................ 68*
*SHURUUDAHA FULINTA EE GANACSIGA CAYMISKA/TAKAFULKA ........................................................ 68*
Qodobka 118aad ........................................................ 68
Xaddidaad Ra'sumaal ........................................................ 68
Qodobka 119aad ........................................................ 68
Xaddidaad Isku-filnaasho Maaliyadeed ........................................................ 68

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 120aad ..... 68
Tilmaamo Maal-gelin ..... 68
Qodobka 121aad ..... 69
Siyaasado la Xiriira Sanduuq Takaful ..... 69
Qodobka 122aad ..... 69
Qodobbada Xalinta ..... 69
Qodobka 123aad ..... 69
Qiyaasta Xalinta ..... 69
*CUTUBKA TODOBO IYO TOBNAAD* ..... *69*
*DHAQAN-GELINTA, TALLAABOOYINKA SIXIDDA IYO TALLAABADA SOO-AFJARIDDA* ..... *69*
Qodobka 124aad ..... 70
Magacaabis Khabiir ..... 70
Qodobka 125aad ..... 70
Baarayaal Madax-bannaan ..... 70
Qodobka 126aad ..... 70
Maamul iyo Awoodo Faro-gelin ..... 70
Qodobka 127aad ..... 71
Hab-dhaqanka Ganacsiga Shati Kala-noqoshada kadib ..... 71
Qodobka 128aad ..... 71
Gaba-gabeyn iyo Soo-afmeerid ..... 71
Qodobka 129aad ..... 72
Iibin-naado Khasab ah ..... 72
Qodobka 130aad ..... 73
Qofka Naadada Mas'uulka ka ah ..... 73
Qodobka 131aad ..... 74
Qorshaha Dammaanadda Ka-qeyb-galayaasha ..... 74
Qodobka 132aad ..... 75
Kidmadda Maamulka ..... 75
*CUTUBKA SIDEED IYO TOBNAAD* ..... *75*
*GANAAXYADA* ..... *75*
Qodobka 133aad ..... 75
Caymis aan Shati Haysan ..... 75
Qodobka 134aad ..... 75
Dib-ugu-dhicida Cusboonaysiinta Shatiga ..... 75

Qodobka 135aad ....................................................................................................76
Ku-xad-gudub Shuruudo Shati....................................................................................76
Qodobka 136aad ....................................................................................................76
Dembiga la Xiriira Hantida Ugu Yar iyo Xadka Isku Filnaanta ......................................76
Qodobka 137aad ....................................................................................................76
Bixinta Adeeg Caymis oo aan Fasax Laga Haysan Bankiga..............................................76
Qodobka 138aad ....................................................................................................76
U Hogaansan La'aanta Shareecada..............................................................................76
Qodobka 139aad ....................................................................................................77
Ka-qeyb-gal Caymis Shisheeye....................................................................................77
Qodobka 140aad ....................................................................................................77
Dib-u-dhigis Macluumaad..........................................................................................77
Qodobka 141aad......................................................................................................77
Hadalo Been Abuur ah ..............................................................................................77
Qodobka 142aad ....................................................................................................77
Ku-xad-gudub Shuruudo Dib-u-Caymis.........................................................................77
Qodobka 143aad ....................................................................................................78
Ku-noqoshada Xad-gudubyada ....................................................................................78
Qodobka 144aad ....................................................................................................78
Ku-xadgudub Shuruuco iyo Xeer-nidaamiyeyaal..............................................................78
Qodobka 145aad......................................................................................................78
Shaacin Xog Qarsoon ................................................................................................78
Qodobka 146aad......................................................................................................78
Bixin War Been Abuur Ah ..........................................................................................78
Qodobka 147aad ....................................................................................................79
Xad-gudubyada Shaqaalaha Dawladda ..........................................................................79
Qodobka 148aad......................................................................................................79
Warbixinno aan Sax ahayn ........................................................................................79
Qodobka 149aad ....................................................................................................79
Ku Dhaqan-galka Shuruucda Kale.................................................................................79
Qodobka 150aad ....................................................................................................79
La-dagaalanka Lacag-dhaqidda iyo Ka-hortagga Maal-gelinta Argagaxisada........................79
Qodobka 151aad ....................................................................................................80

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Xad-Gudubyada aan Lagu Xusin Sharcigan ........ 80

*CUTUBKA SAGAAL IYO TOBAN ........ 81*

*QODOBBO KAMA DAMBAYS AH ........ 81*

Qodobka 152aad ........ 81

Xaddidaadda Shatiga ........ 81

Qodobka 153aad ........ 81

Heshiiska Maal-gelinta ........ 81

Qodobka 154aad ........ 81

Isku-dhaca Danaha ........ 81

Qodobka 155aad ........ 81

Asaaska Ururada iyo Hay'adaha kale ........ 81

Qodobka 156aad ........ 81

Awoodaha Bankiga ee Soo-saarista Xeer-nidaamiyayaal ........ 81

Qodobka 157aad ........ 82

Baabi'in ........ 82

Qodobka 158aad ........ 82

Dhaqan-galka Sharcigan ........ 82

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

## CUTUBKA KOWAAD
## QODOBADA HORDHACA AH

### Qodobka 1aad
### Magaca Sharciga

1. Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Shirkadaha Caymiska".
2. Sharcigan waxaa tixraac u ah sharciyada soo socda
   b) Sharci lr. 69 ee 30/09/1972 (Abuuritaanka Caymiska Qaranka Soomaaliyeed)
   t) Sharci lr.20 ee Janaayo 1973 sharciga caymiska khasabka ah.
   j) Sharci lr.8 ee 26ka Jannaayo 1989, oo u oggolaanayay shirkadaha caymiska gaarka loo leeyahay ee dalka iyo kuwa shisheeye inay ka shaqeeyaan dalka.
   x) Sharci lr.37 ee 23 Nofeembar 1989, Xeerarka hay'adda maaliyadeed ee Soomaaliya.

### Qodobka 2aad
### Ujeeddooyinka

1. In la sameeyo nidaam lagu maamulo laguna kormeero dhammaan arrimaha Caymiska;
2. Qaab-dhismeedka iyo kobcinta Caymiska;
3. Ilaalinta xuquuqda iyo danaha macaamiisha Caymiska;
4. Taageeridda iyo horumarinta xirfadeed ee suuqa Caymiska; iyo
5. Taageerida jawi tartan oo wanaagsan oo dhexmara Shirkadaha Caymiska.

### Qodobka 3aad
### Eray-bixinno

Sharcigan dhexdiisa, ereyadan iyo tibaaxyadaba waa inay lahaadaan macnaha ku hor qoran:

1. **"Akjuweeri"**(Actuary) waxaa loola jeedaa xirfadle aqoon durugsan u leh odoroska khasaaraha ku dhici kara ganacsiga iyo hantida maaliyadeed ee shirkad, banki ama hay'ad ku hawlan ganacsi dhaqaale.

2. **"Wakiil Shirkad Caymis"** Waxaa loola jeedaa shakhsi fulinaya ganacsi caymis isagoo matalaya shirkad caymis rukhsad haysata, waxaana la macna noqonaya "Wakiil Caymis", kaas oo Bankigu siiyey oggolaansho.

3. **"Qodobbada Xeerka Ururka"** waxaa loola jeedaa dokumenti sharci ah oo qeexaya xeerarka lagu maamulayo hawl-wadeennada Shirkadaha caymiska/takaful maamulkiisa gudaha iyo hawlaha.

4. **"Banka-takaful"** Waxaa loola jeeddaa iibinta, suuq-geynta, iyo qeybinta adeegyada caymiska/takafulka ee uu banki u qabanayo isagoo ka wakiil ah shirkadda caymiska/ takaful.

5. **"Bankiga"** waxaa loola jeedaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, oo lagu dhisay Xeerka Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, 2012. Isla markaana sii maamulaya shikadaha Caymiska ilaa inta dib loo soo celinayo Hay'addii Caymiska Qaranka.

6. **"Xuquuqlaha"**waxaa loola jeedaa qofka helay xuquuqda shahaadada Caymiska ama ku helay wareejin sharci ah.

7. **"Golaha Maamulka"** waxaa loola jeedaa Guddiga Maamulka loo xilsaaray, kaas oo kormeera habka maamul ee Shirkaddaha Caymiska.

8. **"Wakiil dallaal"** Waxaa loola jeedaa shaqsi fuliya ganacsi caymis isaga oo matalaaya dallaal caymis oo rukhsad haysta kaas oo Bankigu siiyey ogolaansho.

9. **"Dalaalka"** waxaa loola jeedaa hawlaha ay ka mid yihiin dhexdhexaadinta, diyaarinta, iyo gorgortanka Hishiiska Caymiska ama cusbooneysiintiisa ama kordhinta ka qeyb- galayaasha.

10. **"Heerarka Adeegyada"** waxaa loola jeedaa kala soocida adeegyada layska caymiyo ee ay fulinayso shirkada caymiska/takaful.

11. **"Shirkad"** waxaa loola jeedaa shirkad kasta oo lagu qeexay sharci kasta oo qoran waqtigan la joogo ee la xiriira shirkadaha iyo shirkad kasta oo lagu daray ama ka diiwaan gashan Soomaaliya;

12. **"La-taliyaha"**waxaa loola jeedaa qof uu Bankigu shati u siiyay in uu bixiyo adeegyada la-talinta ee Shirkadda Caymiska, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn la-talinta Shareecada iyo Qiimaynta khatarta Caymiska.

13. **"Khabiir"** waxa loola jeedaa qof karti u leh oo loo magacaabay si waafaqsan sharcigan si uu ula taliyo shirakada caymiska talaabooyinka fulinta u baahan

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ama sixitaanka ee bankigu ka doonayo.

14. **"Caymiska Qoyska"** waxa uu bixiyaa caymiska haddii ay timaado dhimashada ama naafanimada ka-qeyb-qaataha ama Xuquuqlaha u diiwaan-geshan ama xilliga heshiiska caymiska dhamaado, iyo bixinta lacag kabidda ee maaliyadeed.

15. **"Sannad Maaliyadeed"** waxaa loola jeedaa sanadka xisaab-xirka ee dhammaan dadka shatiga u haysta sharcigan.

16. **"U-qalmid"**waxaa loola jeedaa halbeeg loo isticmaalo in lagu go'aamiyo qofka daacadnimadiisa iyo sumcadiisa si loo xaqiijiyo in uu ku haboon yahay doorkiisa.

17. **"Shirkadaha Caymiska ee Ajnabiga ah"** waxaa loola jeedaa hawl-wadeen takaaful oo shati u haysta shuruucda dal shisheeye loona oggolaaday in uu ka shaqeeyo hawlaha caymiska si waafaqsan sharcigan.

18. **"Caymiska Guud"**waxaa loola jeedaa Caymiska sanadlaha ah, oo aan ahayn Caymiska qoyska.

19. **"Baaraha Madax-banaan"** waxaa loola jeedaa qof karti u leh oo loo magacaabay si waafaqsan sharcigan si uu baaris u sameeyo isagoo ka wakiil ah Bankiga

20. **"Dhexdhexaadiye"** waxaa loola jeedaa qofka qabanaya hawlaha dulaalnimada, wakiilnimada ama qiimeeyaha khasaare ama bankigu u go'aamin karo dhexdhexaadiye takaaful ah.

21. **"Maal-gashiyada"**waxaa loola jeedaa waxqabadka maal-gashiga, sameynta raasu- maalka shirkadda Caymiska iyadoo laga fili karo faa'iido.

22. **"Shatiga"** waxaa loola jeedaa oggolaansho lagu fulinayo ganacsi caymis/takaful ama dhexdhexaadin Takaful ah oo uu soo saaray Bankigu si waafaqsan sharcigan.

23. **"Khasaare qiimeeye"**waxaa loola jeedaa qof Bankigu shati u siiyay inuu qiimeeyo dacwad Caymis oo uu go'aamiyo cadadka Magdhawga ee la siinayo qofka cabanaya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

24. **"Guddiga Maamulka"** waxaa loola jeedaa koox mas'uuliyiin sare ah oo u xilsaaran maamulka shirkadda caymiska.

25. **"Raasa-maal ugu Yar"**waxaa loola jeedaa raasa-maalka ugu yar ee loo baahan yahay in uu si joogto ah u ilaaliyo hawl-wadeenka Caymiska ah sida uu farayo sharcigu.

26. **"Habraaca Caymiska"**waxaa loola jeedaa hannaan waafaqsan shareecada oo qeexaya xiriirka iyo waajibaadka ka dhexeeya Shirkadda Caymiska iyo Ka-qeyb-galayaasha.

27. **"Ka qeyb-qaataha"**waxaa loola jeedaa qof haysta Shahaadada Caymiska ee Heshiiska la saxiixday shirkadda Caymiska oo ay ku waajibtay bixinta khidmadda Caymiska.

28. **"Sanduuqa Caymiska ka qeyb-qaateyaasha"**waxaa loola jeedaa sanduuq qaaraanka la bixiyo u gaar ah.

29. **"Dib-u-Caymiska"**waxaa loola jeedaa hab shirkad caymis oo lagu kalsoonyahay la gasho heshiis shirkad Dib-u- Caymiska ee la wadaagida cadad ka mid ah qaaraanka, isla markaana la qeybsata hadii uu qaan-sheegad ku yimaado shirkadda.

30. **"Xeer-nidaamiye"** waxaa loola jeedaa xeerar iyo hab-raacyo lagu saleeyey sharcigan.

31. **"Golaha Saamileyda"**waxaa loola jeedaa hay'ad u taagan danaha dhammaan saamileyda.

32. **"Sanduuqa Saamileyda"**waxaa loola jeedaa akoonka haya raasu-maalka la bixiyay oo ay bixiyaan saamilayda shirkadda Takaful halkaasoo kharashaadka maamulka iyo hawlaha kale lagu bixiyo si waafaqsan sharcigan.

33. **"Guddiga Sare ee Shareecada"**waxaa loola jeedaa guddi khubaro ah oo ku takhasusay Shareecada oo uu sameeyay Bankiga sidii hay'ad la-talin iyo siyaasad- dejineed oo ku saabsan mabaadi'da shareecada ee la

xiriirta hawlaha Caymiska.

34. **"Shareecada"**waxaa loola jeedaa Shareecada Islaamka.

35. **"Sharci-dhawrka Shareecada"**waxaa loola jeedaa qiimayn xilliyeed oo la sameeyo waqti ka waqti si loo sameeyo qiimayn madax-bannaan oo lagu fulinayo awaamiirta Shareecada ee sharcigan iyo xeerarka Caymiska, ee Guddiga Shareecada iyo Guddiga Sare ee Shareecada.

36. **"Sharci-dhawraha Shareecada"**waxaa loola jeedaa qof Bankigu u oggolaaday inuu sameeyo baaris shareecada ah ee la xiriita hawlaha Caymiska.

37. **"Guddiga Shareecada"**waxaa loola jeedaa guddi xeel-dheereyaal shareecada islaamka ah oo ay soo agaasintay Shirkadda Caymiska ah si loo hubiyo ku dhaqanka Shareecada ee hawlaha Caymiska.

38. **"Aqbalka Akjuweeri"**waxaa loola jeedaa qof haysta shatiga Bankiga kaasoo fulinaya waajibaadka wax lagu aqbali karo ama dib-u-eegista lagu smaeyn karo.

39. **"Qasaare qiimeeye"**waxaa loola jeedaa qof Bankigu shati u siiyay inuu baaro khasaaraha iyo inuu hubiyo xaaladda khasaaraha sida burburka baabuurta, adeegyada caymiska, qalabka, ama hantida.

40. **"Caymiska"**waxaa loola jeedaa nidaam caymis oo waafaqsan shareecada ujeedadiisuna tahay in la helo wada-shaqeyn dhex marta koox ka mid ah ka qeyb-galeyaasha si ay wadajir iskaga caawiyaan hadii midkood ku timaado khatar lama filaan ah, ayagoo markaas ku heshiiyey inay bixiyaan qaaraanka isla markaasna shirkadda caymisku u maamusho si waafaqsan shareecada.

41. **"Shahaadada Caymiska"** waxaa loola jeedaa dokumenti caddeynaya jiritaanka heshiis caymis/takaful.

42. **"khidmada Qaaraanka Caymiska"** waxaa loola jeedaa lacagta uu ka qeyb-qaataha caymiska ka bixiyo shahaadada caddeynta ka mid ahaanshaha caymiska.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

43. **"Sanduuqa Maal-gelinta ee caymiska"** macneheedu waa Keyd sanduuq oo u gaar ah ka qeyb-galeyaasha oo loogu tala-galo maal-gelin.

44. **"Hawl-wadeenka Caymiska"**waxaa loola jeedaa shirkadda uu Bankigu u oggolaado in ay qabato hawlaha Caymiska.

45. **"Diiwaanka Heshiiska Caymiska"**waxaa loola jeedaa diiwaanka heshiiska oo qoraal ah una dhaxeeya hawl-wadeenka Caymiska iyo caymis-qaataha,wuxuu ka kooban yahay shuruudaha cayminta, xuquuqda iyo heshiisyada labada dhinac, isla markaana lagu bixiyo shahaadada Caymiska.

46. **"Sanduuqa Magdhawga Caymiska"** waa sanduuqa qaaraanka kaqeyb-qaatayaashu dhigtaan si loogu bixiyo caawinaadda kharashaadka khatarta imaan karta.

## Qodobka 4aad
## Baaxadda Sharciga

1. Sharcigani wuxuu khuseeyaa dhammaan Shirkadaha Caymiska, oo ay ku jiraan shirkadaha gudaha iyo kuwa ajnabiga ah ee ka hawl-gala Soomaaliya ee ka shaqeeya ganacsiga Caymiska iyo dhammaan Shirkadaha Caymiska.
2. Sharcigani wuxuu saameynayaa arrimaha la xiriirta shirkadaha dib-u-caymiska ee ku salaysan heshiiska shirkadda Caymiska oo ah shirkad leh dalbashada la- qeybsiga khatarta iyo dib-u-caymiska oo oggolaata la-qeybsiga khatarta.

## Qodobka 5aad
## Shahaadada Caymiska ee Reeban

1. Shakhsi ama hay'ad kama qaadan karto shahaado Caymis meel ka baxsan Soomaaliya, marka laga reebo in Shirkadaha Caymiska gudaha aysan dabooli karin khatarta.
2. Qof kasta ee doonaya inuu ka soo qaato shahaado Caymis meel ka baxsan Soomaaliya waa inuu marka hore oggolaansho ka helaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

## Qodobka 6aad
## Mabaadi'da Guud ee Caymiska

1. Dhinacyada ganacsiga Caymiska waxaa looga baahan yahay inay

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

hoggaansamaan mabaadi'da guud ee soo socota:

b) ku-dhaqanka shareecada iyo shuruucda kale ee degsan
t) Iskaashiga;
j) daacadnimo;
x) ku-daneysasho ku salaysan Caymiska;
kh) oggaanshaha xaqiiqda sababta dhabta ah;
d) qiimo-ridka;
r) magdhawyada; iyo
s) u-hogaansanaanta nidaamka dib-u-caymiska

## CUTUBKA LABAAD
## MAAMULKA SHARCIYEYNTA IYO KORMEERKA

### Qodobka 7aad
### Awoodda Rukhsadda Sharciyeynta iyo Kormeerk

Awoodda shati-siinta, sharciyeynta iyo ilaalinta hawlaha Caymiska iyo kuwa qabta shaqadaas ee ka diiwaan-gashan Soomaaliya, waxaa leh Bankiga dhexe ee Soomaaliya

### Qodobka 8aad
### Sharciyada iyo Ujeeddooyinka Kormeerka ee Bankiga

1. Bankigu waa inuu u gutaa awoodihiisa uu sharcigan siinayo si uu u arko inay ugu habboon tahay inuu u fuliyo ujeeddooyinka xeer-nidaamiye iyo kormeer ee soo socda-
   b) ilaalinta ka-qeyb-galayaasha caymiska iyo ka-faa'iidaystayaashooda
   t) in kor loo qaado ilaalinta hufnaanta, bed-qabka, iyo habsami-u-socodka shaqada caymiska
   j) ka-qeyb-qaadashada xasiloonida maaliyadeed; iyo
   x) inuu qabto hawlaha kale ee uu sharcigani u oggolyahay iyo sharciyada kale ee dalka.

### Qodobka 9aad
### Awoodaha iyo Xilalka Guud ee Bankiga

1. Bankigu wuxuu leeyahay xilalka iyo awoodaha soo socda:
   b) dejinta, fulinta iyo ilaalinta siyaasadaha, habraacyada, qorshayaasha jira iyo kuwa horumarineed ee la xiriira Caymiska.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

t) in la dejiyo barnaamijyada horumarinta mustaqbalka Caymiska ee dalka.

j) jiheynta, qiimaynta, xisaabinta iyo kormeeridda hawlaha Shirkadaha Caymiska, laamaha Shirkadaha Caymiska iyo hawl-wadeennada Caymiska.

x) soo-saarista, cusboonaysiinta, joojinta, wax-ka-beddelka, iyo kala noqoshada shatiyada Shirkadaha Caymiska, laamaha Shirkadaha Caymiska iyo hawl- wadeenka Caymiska

kh) helitaanka iyo isdhaafsiga xogta kormeerka ee hay'adaha kale ee Caymiska ee ku saabsan Shirkadaha Caymiska ee dalka ama Shirkadaha Shisheeye ee Caymiska ka hawl-gala dalka ama hay'adahooda sharciga ah.

d) dejinta iyo dhaqan-gelinta xeer-nidaamiyeyaal, habraacyo, wareegtooyin ku saabsan arrimaha Caymiska iyo hab-dhaqanka, anshaxa, maamulka, hanti- dhawrka, maaraynta khatarta, maamulka shareecada iyo u-hoggaansanaanta, bed- qabka, habka Keydka iyo noocyada Keydka Shirkadaha Caymiska, xuquuqda iyo faa'iidooyinka ka qeyb-galayaasha iyo xeerarka kale ee lagu sheegay sharcigan.

r) qabashada warbixinnada, macluumaadka iyo dukumentiyada Shirkadaha Caymiska iyo Xirfadlayaasha Caymiska xilli kasta iyo marka loo baahdaba.

s) helitaanka iyo tallaabo ka-qaadidda cabashooyinka iyo in la caddeeyo dembiilayaasha iyo Shirkadaha ku xad-gudbay qodobbada Sharcigan iyo shuruudaha ku cad rukhsadooda ganacsi.

sh) Daabacaadda warbixinnada iyo macluumaadka hawlaha la xiriira Shirkadaha Caymiska.

dh) in la fuliyo dhammaan waxbixinada shareecada ee ka soo baxda guddiga sare ee shareecada.

c) in la helo oggolaanshaha Guddiga Sare ee Shareecada dhammaan noocyada caymis ee cusub iyo arrimaha shareecada ee ay soo gudbiyaan Shirkadaha Caymiska.

g) shaqaalaysiinta, tababaradda xirfadlayaasha Caymiska iyo khabiirrada Caymiska.

f) Sameynta waajibaadyada kale ee ku qeexan sharcigan.

## Qodobka 10aad

## Awoodaha Kormeerka iyo Hanti-dhawrka

1. Bankigu waa inuu lahaadaa awoodaha soo socda si uu u kormeero ooou

xisaabiyo hawlaha Caymiska:

b) inuu kormeero oo uu baaro Shirkadaha Caymiska xagga u-hoggaansanaanta iyo dhinacyada la xiriira khataraha ayadoo lagu fulinayo kormeerka ka baxsan

goobta iyo kan goobta iyo kormeerka ku salaysan khatarta si loo baaro hawlaha Shirkadaha iyo Xirfadlayaasha Caymiska, qiimeynta xaaladahooda iyo kormeeridda tayada iyo wax-ku-oolnimada maamulkeeda ka shirkad ahaan iyo u-hoggaansanaantooda sharciga khuseeya iyo shuruudaha kormeerka.

t) Samaynta Sharci-dhawrka shareecada ee Shirkadaha Caymiska.

j) In hanti-dhawrayaashu ay u soo gudbiyaan qorshahooda Sharci/hanti-dhawrka rubuca hore ee sannad-maaliyadeed kasta Bankiga.

x) In la sameeyo oo la hirgeliyo halbeegyada daahfurnaanta ee hawlaha ay qabtaan Shirkadaha Caymiska iyo Hawl-wadeenka Caymiska.

kh) Qiimaynta iyo ilaalinta tayada iyo heerka saxda ah ee saamilayda, xubnaha Guddida Shareecada, xubnaha Guddida Maamulka, maamulka, iyo shaqaalaha muhiimka ah ee Shirkadaha Caymiska si gaar ah iyo si wadajir ah.

d) inuu kormeero Shirkadaha Caymiska ganacsigooda, kuna dhaqma xirfaddooda, daryeelka iyo hawl-karnimo, ulana dhaqmaan ka-qeyb-galayaasha si caddaalad ah, ka hor inta aan la gelin heshiiska Caymiska iyo ilaa heer ay dhammaan waajibaadka Heshiiska Caymiska ku jiraan lagu qanco.

r) oggaanshaha, kormeerka iyo falanqaynta suuqa iyo horumarka maaliyadeed iyo arrimaha kale ee deegaanka ee saameeya hawlaha Caymiska.

s) qaadashadatallaabooyinka degdegga ah ee lagama maarmaanka ah haddii ay jiraan xaalado aan caadi ahayn.

2. Shaqaalaha Bankigu waa inay u kormeeraan si xirfad sare ku jirto marka ay gudanayaan waajibaadkooda, waana inay ilaaliyaan sirta.
3. Shaqaalaha Bankigu waxay yeelanayaan xasaanad sharci, marka ay gudanayaan waajibaadkooda rasmiga ah.
4. Bankigu waa inuu si joogto ah u baaro buugaagta iyo diiwaannada Shirkadaha Caymiska iyo hawl-wadeenka Caymiska.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
الجمهورية الفيدرالية الصومالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

## Qodobka 11aad
## Kormeerka

1. Bankigu waa inuu ku sameeyaa baaris goobta Shirkadda Caymiska, joogteynta baarista xisaab-xirka ayadoo lagu saleynayo xaaladaha ay leedahay Shirkad kasta, inta lagu jiro xisaab-xirka goobtaas.
2. Bankiga waa inuu dib-u-eegis ku sameeyaa arrimaha maaliyadda, maamulka, iyo sharciga, u-hoggaansanaanta Shareecada, wax kala iibsiga, xisaabaadka, hantida, iyo dokumentiyada, oo ay ku jiraan heshiisyada dib-u-caymiska, caddaynta dakhliga iyo kharashyada iyo dokumentiyada kale ee lagama maarmaanka ah ee la xiriira kuwa cusub iyo kuwii hore ee arrimaha shirkadaha Caymiska.
3. Shirkadaha Caymiska waxaa looga baahan yahay inay keenaan dokumentiyada lagama maarmaanka ah, diiwaannada iyo warbixinnada loo xilsaaray hanti-

   dhawrka ama Bankiga inta lagu jiro ama ka hor xisaabinta, Hanti-dhowruhu waa inuu geli karaa meelaha dokumentiyada iyo diiwaannada lagu hayo, sida kombuyuutarrada iyo qaanadaha/qasnadaha.
4. Marka laga reebo xaaladaha Shirkadda Caymiska la kulmo dacwadaha kicitaan ama xaalado kale oo degdeg ah, Bankigu waa inuu ku wargeliyaa Shirkadda Caymiska toban maalmood oo warqad qoraal rasmi ah ka hor inta uusan ku fulin ficillada kor ku xusan.
5. Dhammaan macluumaadka uu Bankigu helo waxaa loola dhaqmayaa si qarsoodi ah marka laga reebo si kale oo uu sharci u qeexay.
6. Bankigu waxa uu isticmaali karaa hanti-dhawre dibadda ah si uu u xisaabiyo Shirkadda Caymiska oo uu siiyo waxa lagama maarmaanka ah tilmaamaha lagu gudan karo waajibaadka laga rabo, isla markaasna Shirkadda Caymiska ayaa bixin doonta kharashka.

## Qodobka 12aad
## Guddiga Sare ee Shareecada

1. Bankigu waa inuu dhisaa guddi sare oo shareecada ka shaqeeya oo ah hay'adda la- talinta mabaadi'da shareecada ee la xiriira hawlaha caymiska ee Soomaaliya.
2. Guddiga Sare ee Shareecada wuxuu ka koobnaanayaa 5 xubnood.
3. Bankigu waa inuu hubiyo in xubin kasta oo ka tirsan Golaha Sare ee Shareecada ay buuxiso shuruudaha ku xusan sharcigan.
4. Bankigu wuxuu u soo jeedin karaa la-taliyeyaashiisa sare inuu ka daro 3

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ilaa 5 xubnood ee shareecada, khubarada Caymiska, sharciyaqaan ama kuwo la midah oo takhasuskaas leh oo noqonaya xubno aan codeyn ku dhex lahayn Guddiga Sare ee Shareecada.

5. Xubnaha Golaha Sare ee Shareecada ayaa xubnahooda mid ka mid ah u dooranaya guddoomiye midna guddoomiye ku-xigeen.
6. Xubinta Guddida Sare ee Shareecada ma noqon karto agaasime, xubin ka tirsan guddiga shareecada, shaqaalaha maamulka fulinta ama saamile ka mid ah Shirkadaha Caymiska ee dalka.
7. Guddida Sare ee Shareecada waxay u yeeran karaan guddiyada shareecada ee Shirkadaha Caymiska sida shirar laba geesood ama wadareed ah si ay uga doodaan arrimaha hoos yimaada mas'uuliyadda guddiyada shareecada ama dhibaatooyinka khuseeya Caymiska.

## Qodobka 13aad
## Waajibaadka Golaha Sare ee Shareecada

1. Guddiga Sare ee Shareecada waa awoodda ugu sareysa ee ku-dhaqanka shareecada ee Caymiska.
2. Haddii ay dhacdo kala duwanaansho ra'yiga Shareecada ee Caymiska ama
   fikradda, go'aanka maxkamadda ayaa noqonaya kama dambays.
3. Guddiga Sare ee Shareecada wuxuu yeelanayaa shaqooyinka soo socda:
   b) la-talinta Bankiga ee ilaalinta ku-dhaqanka shareecada ee Caymiska.
   t) Qiimaynta iyo ansixinta xeerarka, siyaasadaha iyo hab-raacyada Bankiga ee ku-dhaqanka shareecada ka hor inta aan la dirin ayagoo gacansiinaya hay'adaha ay khusayso ka dibna lagu dabaqo Shirkadaha Caymiska.
4. Qiimaynta iyo ansixinta maamulka shareecada iyo u-hogaansanaanta siyaasadaha, adeegyada, hab-tilmaameedka iyo hab-raacyada hawl-fulinta iyo maaraynta Shirkadaha Caymiska si loogu hoggaansamo shareecada, Guddiga Sare ee Shareecada waa in ay fikradahooda iyo talooyinkooda ku bixiyaan qaab- qoraal ah.
5. Xubnaha Guddiga Sare ee Shareecada waa inay xafidaan dhammaan macluumaadka laga helo Bankiga, Shirkadaha Caymiska iyo Xirfadlayaasha Caymiska.
6. Marka dacwad kasta oo la xiriirta ganacsi caymis/takaful la horgeeyo maxkamad ama gar-qaade kasta ay ka soo baxdo su'aal ku saabsan arrimaha la xiriira shareecada, maxkamadda ama dhex-dhexaadiyaha waxay su'aashaas kala tashanayaan Guddiga Sare ee Shareecada.

7. Maxkamadda, iyadoo loo eegayo soo-jeedinta Gollaha Sare ee shareecada iyada
   ayaa leh go'aanka kama dambaysta ah.

## Qodobka 14aad
## Xeerka Habsami-maamulka

1. Bankigu waa inuu dejiyaa qaab-dhismeedka hab-sami-u-maamulka kor-joogteynta kaasoo ku lug leh aqoonsiga, la-socodka iyo qiimaynta:
   b) daldaloolada guud ee qeybaha iyo soo-bandhigidda dhameystiran ee qeybta caymiska; iyo
   t) khatarta kordhi karta iyo gudbinta lamafilaanka leh ee nidaamka maaliyadeed iyo dhaqaalaha oo ay sababto baaxadda, ku-adkaashaha, wax-ka-beddel la'aanta iyo/ama isku xirka caymiska dhibaateysan ama fashilmay ama arrimaha isku jirka ah ee cakiran ee saameeya caymisyo isla mid ah oo la kulma khataraha caadiga ah.

## Qodobka 15aad
## Wadajirka Kormeerka

1. Bankigu waa inuu kormeer dhammeystiran ku sameeyo hawl-wadeennada caymiska oo qeyb-qeyb u habaysan si waafaqsan qodobbada sharcigan.
2. Bankigu waa inuu kormeer buuxa ku sameeyo shirkadaha sharciga ah ee la xiriira hawl-wadeennada caymiska ama xubnaha hawl-wadeennada caymiska ama dadka xiriirka la leh shirkadaha wax ka leh hawl-wadeennada caymiska ee Soomaaliya, xubin ama waddan shisheeye oo xafiisyadooda ku yaallo Soomaaliya.

# CUTUBKA SADEXAAD
# HAB DHAQANKA HAWLAHA CAYMISKA AH

## Qodobka 16aad
## Isticmaalka Erayga Caymiska/Takaaful

1. Looma diiwaan-gelin karo erayga caymis/takaaful qof ama hay'ad aan ka shaqayn hawlaha caymiska/takaafulka sida uu qabo sharcigan, iyadoo aan oggolaansho laga haysan Bankiga,
2. Marka ay helaan oggolaanshaha Bankiga, adeegsiga erayga

caymis/takaaful ama erayo u dhigma kuwaasoo laga soo dheegtay luuqado kale ama erayo kale oo lagu qaban karo hawlaha caymis/takaaful ee gudaha Sooomaaliya, magacaas ayay u isticmaali karaan dokumentiyada iyo xayaysiintooda.

## Qodobka 17aad
## Sameynta iyo Maamulidda Sanduuqyada

1. Shirkad kasta oo ka mid ah Shiradaha Caymiska ee ku diiwaan-gashan sharcigan waa inay abuurtaa, si waafaqsan qodobkan, sanduuqa Caymiska oo la xiriira heerka nooca Caymiska ee ay shiraddu ka waddo Soomaaliya, taasoo waafaqsan nidaamka hawlaha caymiska ee Soomaaliya.
2. Waa in lagu shubaa sanduuqa Caymiska dhammaan lacagta la qabtay ee u gaarka ah nooca caymis ee sanduuqu la xiriiro (oo ay ku jiraan dakhliga sanduuqa ka yimid maal-gelinta), hantida ku jirta sanduuqa waxaa lagu dabaqi karaa oo keliya si loo daboolo qeybtaas, waxaana hantida sanduuqa laga jari karaa oo keliya qaamaha iyo kharashyada ku taagan Shirkaddaasi.
3. Marka laga hadlayo sanduuqa ganacsiga Caymiska qoyska, qeyb ka mid ah sanduuqa laguma qoondayn karo faa'iidooyinka Caymiska ee ka-qeyb-galayaasha, marka laga reebo oggolaanshaha akjuweeriga, haddii hantida dheeraadka ee ka badatay kharashaadka la bixiyey sida ku cad qiimaynta sharciga ah ee ugu danbeysa ee sanduuqa, hantida dheeraadka ah waa in loola dhaqmaa nidaam ka- qeybqaataha looga dhimayo bixinta khidmada hore loogu qoondeeyay.
4. Haddii saddex sano oo xiriir ah ay hoos u dhacdo sanduuqa qaaraanka caymiska, hawl-wadeenada caymisku waa in ay u gudbiyaan bankiga warbixin ay ku sharxayaan sababaha.
5. Haddii ay dhacdo xaalad is-bixin la'aan, hantida ku jirta deebaajiga uu sameeyay hawl-wadeen caymiska sharcigani ee khuseeya nooc caymis, waxaa loo diiwaan- gelinayaa hanti sanduuqa caymisku leeyahay ee hawl-wadeennadu u asaasay dhinaca hawlaha caymiska, waxaana hantidaas lagu dabaqayaa qodobkan farqaddiisa 2aad.
6. Hadii Shirkad Caymis la baabi'iyo lacagaha macaamiisha iyo xuquuqaadka kale oo ay haysay waxaa loo maamulayaa sida uu Bankiga Dhexe kusoo saaro Xeer-nidaamiye.
7. Bankigu waa inuu soo saaraa xeer-nidaamiye ku saabsan shuruudaha la xiriira lacagaha Caymiska gaar ahaan kororka iyo hoos u dhaca ku

yimaada hantida takaaful/caymis iyo faa'iidada lacagta Caymiska, iyo hab-raac kasta oo kale oo la xiriira maaraynta taxadarka leh iyo ilaalinta lacagaha Caymiska.

## Qodobka 18aad
## Shuruudaha Hantida Sanduuqa Caymiska

1. Hantida sanduuqa Caymiska ee sharcigan ku cad waa in laga ilaaliyaa dhammaan hantida kale ee Shirkadda. Waa in aanay ku darin hantida ka kooban deebaaji ee sharcigan ama wax lacag ah sababtuna tahay niyad wanaag, faa'iidada kharashka horumarinta, ama adeeg caymis la mid ah oo aan la xaqiijin karin marka laga reebo ganacsiga ama qeyb ka mid ah ganacsiga Shirkadda.
2. Ma jiro wax kala beddelasho ah oo u dhexeeya maaliyad kasta oo Caymiska ah oo ay aasaastay Shirkadda Caymiska ah iyada oo aan oggolaansho hore laga helin Bankiga.

## Qodobka 19aad
## Hagaajinta Xisaabaadka

1. Shirkadda Caymiska waa inay xafiddaa xisaabaadkeeda si waafaqsan Heerarka Warbixin-xisaabeedka Soomaaliyeed ee la oggolyahay.
2. Bankigu wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiye qeexaya:
   - b) qaabka iyo habka loo ilaaliyo diiwaannada xisaabaadka ee Shiradaha Caymiska;
   - t) diiwaannada lagu hayo qeyb ka mid ah diiwaannada xisaabaadka hawlwadeenka Caymiska;
   - x) muddada la hayo diiwaannada xisaabaadka, iyo
   - kh) Shuruudaha kale ee lagu dabaqi karo diiwaannada xisaabaadka.
3. Diiwaanka xisaabaadka ee Shirkadda Caymiska waa in lagu hayaa xafiiskeeda Soomaaliya.

## Qodobka 20aad
## Diiwan-gelin Shahaadooyin Caymis

1. Shirkadda Caymiska waa inay sameysaa oo ku xafiddaa diiwaanka shahaadooyinka Caymiska ee la xiriira ganacsigeeda goobta lagu

muhiimsan ee ganacsiga Soomaaliya, wax shahaado ah oo soo galey diiwaanka shirkadda lagama saari karo ilaa iyo inta ay jirto mas'uuliyadda hawlwadeenka Caymiska ee ku saabsan shahaaddadaas.

2. Bankigu waa inuu qeexaa qaabka, nuxurka iyo shuruudaha kale ee la xiriira Diiwaanka Shahaadooyinka Caymiska.
3. Codsiga qof kasta oo danaynaya shahaadada Shirkadda, Shirkaddu waa inay ku war-gelisaa inay ku jirto Diiwaanka iyo in kale.

## Qodobka 21aad
## Ka-noqosho Shahaadooyin

1. Shirkadda Caymisku waa inay hubisaa in Sharciga Caymisku qeexayo duruufaha lagu bixinayo lacag-u-celinta ka-noqoshada shahaadooyinka ka-qeyb-qaataha iyadoo si saxan loo xisaaabinayo.
2. Shirkadaha Caymisku waa inay tixgeliyaan arrimaha soo socda marka ay go'aaminayaan qiimaha shahaado-celinta, oo ay ku jirto kharash kasta oo la xiriira arintaas-
   b) haddii ay khusayso, si waafaqsan mabaadi'da akjuweeriga ah ee la aqbalay;
   t) si loo hubiyo in si cadaalad ah loola dhaqmo ka qeyb-galayaasha; iyo
   j) iyadoo la raacayo halbeegyada hab-dhaqanka suuqa ee ku qeexan sharcigan ama xeerarka uu soo saaro Bankiga.

3. Shirkadda Caymisku waa in ay xaqiijisaa lacagta dib loogu celinaayo caymislaha in laga soo saaro koontada saxda ah.

## Qodobka 22aad
## Warbixin Maaliyadeed

1. Xisaab-xirka hawl-wadeennada caymiska ee la hubiyay waxay ka kooban yihiin:
   b) bayaan ku saabsan mawqifka maaliyadeed ee hawl-wadeennada caymiska sida taariikh xisaabeedkeeda;
   t) bayaan ku saabsan heerka maaliyadeed ee shirkadda caymiska sida taariikh xisaabeedkeeda;
   j) bayaan dakhli dhammaystiran ee hawl-wadeenka caymiska ee la xiriira sannad-maaliyadeedka ku dhammaanaya taariikhda haraaga xisaab-xirka;
   x) bayaan xisaabeedka dakhliga ee ku saabsan ganacsi kasta oo caymis ah oo uu wado hawl-wadeenku sanadkaas;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

kh) bayaan ku saabsan socodka lacagta caddaanka ah ee hawl-wadeenada ee la xiriira sannad-maaliyadeedka ku dhammaanaya taariikhda haraaga xisaab- xirka iyo

d) Qoraal kasta ama dokumenti kale oo siinaya macluumaad la xiriira xisaabaadka iyo caddeynta baaqiga ee uu Bankigu u baahan karo.

2. Hawl-wadeennada caymisku waa inay u soo gudbiyaan xisaab-xirka xisaabaadka la baaray muddo saddex bilood gudahood ah ka dib dhammaadka sannadka ay khusayso xisaab-xirkaas.
3. Hawl-wadeenku sidoo kale waa inuu u soo gudbiyaa Bankiga xisaab-xirkiisa xisaabeed ee aan la baarin saddexdii biloodba hal bil gudaheed ka dib dhammaadka rubuc sanad maaliyadeed kasta.
4. Bankigu wuxuu soo saari karaa xeerar qeexaya shuruudaha la xiriira diyaarinta, qaabka ama arrimaha ku jira xisaab xirka xisaabaadka ee ay diyaarinayso shirkadda caymiska.

## Qodobka 23aad
## Warbixin Gaar ah ee Caymis

1. Marka lagu daro shuruudaha ku xusan qodobka 23aad ee sharcigan, warbixinta maaliyadeed ee Shirkadda Caymiska waxa kale oo ku jiri doona kuwan soo socda;
   b) adeeg caymis oo gaar u ah nooc kasta oo Caymis;
   t) faafaahinta maaliyadeed ee sanduuqa caymiska;
   j) faahfaahinta Qard-xasan;
   x) faahfaahinta dakhliga dheeriga ah iyo qeybintiisa;
   kh) faahfaahinta ku-dhaqanka shareecada;
   d) wax-ka-beddelka Guddiga Shareecada iyo Waaxda Shareecada;
   r) natiijooyinka ka yimaada Sharci-dhawrka shareecada; iyo
   s) warbixin kasta oo kale oo uu Bankiga u baahan yahay.

## Qodobka 24aad
## Akjuweeriga hawlaha Caymiska

1. Caymisku waa inuu dejiyaa akjuweeriyaal dhab ah oo awood u leh inay qiimeeyaan ugu yaraan qodobbada farsamo, khidmadaha caymiska iyo qiimayntooda, u- hoggaansanaanta shuruudaha sharciga ee la xiriira iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

maaraynta cawaaqibka maaliyadeed ee ka dhalanaya dhacdooyin ama khataro aan la filayn.

2. Marka caymisku sameeyo caymiska qoyska ama caymiska muddada dheer, caymisku waa inuu hawl-geliyaa hawlwadeen la magacaabay oo awood u leh in uu bixiyo kormeeridda shaqada dhabta ah.

## Qodobka 25aad
## Heerarka Akjuweeriyada Dhabta ah

1. Bankigu waa inuu soo saaraa xeer-nidaamiye qeexaya halbeegyada:
   b) xisaabinta akjuweeriyadda dhabta ah ee lagu sameeyay si waafaqsan shaqada dhabta ah ee caymiska, oo ay ku jiraan qodobbada farsamada;
   t) nuxurka iyo qaabka xogta akjuweeriyada dhabta ah iyo warbixinaha la siiyo Bankiga.

2. Xeerar-nidaamiyeyaashani waa inay sidoo kale qeexaan arrimahan soo socda:
   b) hab-raaca ay raacayaan hawl-wadeennada caymiska/takafulka ee ku saabsan magacaabista akjuweeriga.
   t) awoodaha iyo waajibaadka shaqo ee akjuweeriga.
   j) baaritaannada uu samaynayo akjuweeriga.
   x) bixinta ogeysiisyada iyo warbixinnada dhabta ah ee la siinayo Bankiga; iyo
   kh) heerarka akjuweeriyada ah ee lagu aqoonsaday tirakoobka shaqada caymiska/ takaafulka ee ay tahay in ay raacaan akjuweeriga uu magacaabay hawl-wadeenada Caymiska.

## Qodobka 26aad
## Qaabeynta Dib-u-caymiska

1. Shirkadda Ceymiska waa inay lahaataa qaabab waafaqsan mabaadi'da Caymiska ee qaadashada hannaanka dib-u-ceymiska qaamaheeda ee khuseeya khataraha ay gashay ama shirkaddu ku fili karto inta ay ku gudo jirto hawsha Caymiska.
2. Bankiga wuxuu ku soo saari karaa wargelin qoraal ah, wuxuuna uga baahan karaa Shirkadda Caymiska fulinta kormeerkiisa, muddo lagu cayimay war-gelinta Bankiga, heshiisyada dib-u-Caymiska, macluumaadka kale ee faahfaahsan ee ku saabsan, iyo wixii kale ee dib-u-caymiska ah xaaladaha gaarka ah ee looga baahan yahay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 27aad
## Xakamaynta Isbeddelka

1. Wax isbeddel ah laguma samayn karo gacan-ku-haynta Shirkadda Caymiska ee ka diiwaan-geshan Soomaaliya ilaa Bankiga uu qoraal ku oggolaado isbeddelkaas.

2. Qeybtan, "xakamaynta" waxaa loola jeedaa haysashada lahaansho, si toos ah ama si dadban, awoodda lagu hagi karo ama jiheyn karo maamulka iyo shuruucda shirkadda.

## Qodobka 28aad
## Awoodaha Kormeerka

1. Bankigu wuxuu awood u leeyahay inuu sameeyo kormeerka meel ka baxsan goobta iyo kormeerka goobta dhexdeeda ah ee dhammaan hay'adaha lagu kormeerayo sharcigan, wuxuuna awood u leeyahay inuu codsado dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka ah si uu u guto waajibaadkiisa.
2. Bankigu wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiye qeexaya
   - b) shuruudaha goobta iyo hawlaha kormeerka goobta, kuwaasoo ku kala duwanaan kara nooca caymis iyo qeybta hawlaha Caymiska;
   - t) xeerar qeexaya inta jeer ee kormeerka, baaxadda, iyo qoto dheeraanta hawsha kormeerka Bankiga.

## Qodobka 29aad
## Warbixinta Kormeerka

1. Natiijooyinka kormeerka goob-joogga ah ee uu Bankiga sameeyay waa in lagu war- geliyo Guddiga Maamulka, nuqul ka mid ahna loo diro maamulka Shirkadda Caymiska.
2. Caymisku waa inuu u soo gudbiyo Bankiga qorshe-hawleed uu ku fulinayo dhammaan talooyinka ku jira warbixinta, qorshe-hawleedkuna waa inuu muujiyo waqtiga kama dambaysta ah ee soo-jeedin kasta la fulinayo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 30aad
## Waajibaadka Dheeraadka ah iyo Dhaqanka Suuqa

1. Bankigu wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiye qeexaya waajibaadka Shareecada ee dheeraadka ah ee Shirkadaha Caymiska.
2. Bankigu waa inuu soo saaraa xeer-nidaamiye ku saabsan shuruudaha anshaxa suuqa gaarka ah, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn:
   b) qaab-dhismeedka khidmadda iyo saamiga faa'iidada wadaagga;
   t) siinta macluumaadka ka qeyb-galayaasha;
   j) macluumaadka ku saabsan ka qeyb-galayaasha;
   x) xayeysiisyada;
   kh) wax-ka-qabashada qaan-sheegatooyinka iyo cabashooyinka;
   d) iibinta adeegga ama qorshayaasha Caymiska iyadoo loo marayo internetka ama hababka talefanka gacanta.
   r) Caddaalad kula dhaqanka macaamiisha.

# CUTUBKA AFARAAD
# SHATI-SIINTA

## Qodobka 31aad
## Shati-siin Shirkad Caymis

1. Marka laga reebo sida ku xusan sharcigan, kaliya shirkadda ku diiwaan-gashan sharcigan ayaa sii wadi karta hawlaha caymiska/takaful:

   b) gudaha Soomaaliya (ha ahaato dhinaca caymiska/takaaful ama dib-u- caymiska ee Soomaaliya; ama
   t) meel ka baxsan Soomaaliya marka laga hadlayo hawlaha caymiska, marka laga reebo kaliya hawlaha dib-u-caymiska Soomaalida.

2. Shirkadda hawlaheeda caymis/takaful ah oo ka hor imaanaya farqada (1) ee qodobkan, waxay gelaysaa fal-dembiyeed, waxaana lagu xukumayaa ganaax lacageed sida uu dhigayo sharciga.
3. Bankigu wuxuu bixin karaa shatiyada ganacsiga caymiska/takaful qoyska iyo ganacsiga guud ee takaful.
4. Hawl-wadeenka caymiska/takafulka waxaa laga yaabaa in loo fasaxo nooca ama noocyada caymiska sida ku cad xeerarka.
5. Shirkad kasta oo shati haysata waa inay ku soo bandhigtaa rukhsaddeeda xafiiska maamulkeeda iyo nuqulka shatiga dhammaan

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

laamihiisa.

## Qodobka 32aad
## Xaq-u-yeelashada Codsadaha

1. Codsadaha shatiga si uu u fuliyo ganacsi kasta oo Caymis ah waa inuu ahaadaa mid mas'uuliyadda shirkaddu xaddidan tahay.
2. Shirkadda u diiwaan-gashan Shirkad Caymis si waafaqsan sharcigan, waxay xaq u leedahay inay qaaddo keliya nooc ama noocyada hoos yimaadda ee ganacsiga Caymiska oo ay u diiwaan-gashan yihiin.
3. Codsadaha shatiga si uu u fuliyo ganacsiga Caymiska waxaa ka mamnuuc ah qabashada ganacsi kasta oo kale.
4. Bankigu waa inuu soo saaraa xeer-nidaamiye qeexaya shuruudaha shati-siinta Shirkadda Caymiska, oo ay ku jiraan dukumentiyo iyo shuruudaha kale ee habka codsiga.

## Qodobka 33aad
## Debaajiga Bankiga Dhexe

Shirkadda caymiska ee codsanaysa shati in la siiyo, waa inay dhigtaa oo ku keydisaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya boqoley ka mid ah hantideeda guud sida lagu qeexi doono xeer-nidaamiyayaasha Bankiga dhexe soo saaro.

## Qodobka 34aad
## Shati Gaar ah

Shirkadda Caymiska waa inay ka qaadataa Bankiga shati gaar ah sida Caymiska Qoyska iyo Caymiska Guud.

## Qodobka 35aad
## Habka Shati-siinta

1. Shirkadda Caymiska ee codsanaysa shatiga si ay u sii waddo ganacsiga Caymiska, waa inay soo gudbisaa arji, si sax ah loo dhammaystiray oo qoraal ah, isla markaana ay la socdaan dokumentiyada lagu qeexay xeer-nidaamiyaha uu soo saaray Bankigu.
2. Xeer-nidaamiyaha laga soo saarayo arintan waa inuu qeexaa qaabka iyo kharashka shatiga.

## Qodobka 36aad
## Go'aanka Bankiga

1. Marka codsiga shatigu soo gaaro Bankiga, waa inuu muddo toddobo (7) maalmood gudahooda ah, qoraal ahaan oo ay ku jiri karaan hab elektaroonig ah ugu caddeeyaa codsadaha.
2. Haddii Bankigu oggaado in codsaduhu aanu buuxin shuruudaha, waa inuu codsadaa faahfaahin dheeraad ah si loo buuxiyo codsiga, Bankiguna waa in uu ku caddeeyaa helitaanka macluumaadka la codsaday kow iyo labaatan (21) maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la helo qoraalka, oo ay ku jiri karaan hab elektaroonig ah.
3. Muddo aan ka badnayn saddex (3) bilood oo ka bilaabmaysa taariikhda la helay codsiga oo dhammaystiran, Bankigu waa inuu go'aansadaa inuu oggolaado ama diido codsiga, Bankigu waa inuu qoraal ku ogeysiiyaa codsadaha shatiga.
4. Shatiga la bixiyay waa:
   b) inuu ahaado qoraal iyo foomka hab qeexan; iyo
   t) sheegidda nooca uu yahay shatiga, oo ay ku jiraan nooca, noocyada, ama noocyada hoos yimaadda ee ganacsiga Caymiyaha qofka loo oggolaaday inuu ka shaqeeyo.

5. Bankigu wuxuu Shirkadda Caymiska ee shatiga la siiyay ku soo rogi karaa xaddidaadyo dheeraad ah sama shuruudo si waafaqsan sharcigan.
6. Haddii uu Bankigu diido inuu siiyo rukhsad codsadaha ama uu shuruudo ku soo rogo bixinta shatiga, waa inuu qoraal ku caddeeyaa sababaha diidmada ama shuruudaha keenay.
7. Go'aamada Bankiga waxaa laga qaadan karaa rafcaan ama dib-u-eegis iyadoo loo marayo hab sharcigu qeexayo.

## Qodobka 37aad
## Muddada Shatiga

1. Shatiga dhammaan shirkadaha Caymisku wuxuu dhacayaa 31 Diseembar ee sannad kasta.
2. Shirkadda Caymiska waa in loo oggolaadaa inay ku shaqeyso muddo la cusboonaysiin karo oo ah labo iyo toban (12) bilood.
3. Shati-siinta kowaad, Shirkadda Caymisku waa inay ku wargelisaa Bankiga afar iyo toban (14) maalmood gudahooda marka ay bilawdo ganacsigeeda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

4. Haddii Shirkadda Caymisku aysan bilaabin ganacsiga muddo laba iyo toban (12) bilood gudahooda laga bilaabo taariikhda shatiga, looma oggola inay billawdo ganacsiga shatiga loo siiyay, iyadoo aan oggolaansho qoraal ah kahelin Bankiga.
5. Caymiyaha jebiya farqada (3) ee qodobkan, waxa lagu soo rogaayaa in uu bixiyo ganaax lacageed sida ku cad sharcigan.

## Qodobka 38aad
## Xafiiska Maamulka

1. Shirkadaha Caymiska ee ku diiwaan-gashan sharcigan, waa inay xafiiskooda maamulka ku leeyihiin Soomaaliya.
2. Shirkad Ajnabi ah oo Caymis kana shaqeysa gudaha Soomaaliya si waafaqsan sharcigan, waa in ay xafiis maamuleed ka sameysataa Soomaaliya.

## Qodobka 39aad
## Diiwan-gelin Shirkad Caymis

1. Bankigu waa inuu sameeyaa oo uu hayaa diiwaan cusboonaysiin ee dhammaan Shirkadaha Caymiska ee idman shatigana haysta.
2. Diiwaanka la cusboonaysiiyay ee dhammaan Shirkadaha Caymiska ee la oggol yahay iyo kuwa shatiga haysta waa in lagu daabacaa mareegaha Bankiga.

## Qodobka 40aad
## Laalis iyo Rukhsad Kala Noqosho

1. Shatiga ma ansaxayo xaaladaha soo socda:
   b) haddii Sharcigan la laalo;
   t) haddii shatiga uu kala laabto Bankiga ama sidaa ay codsatay shirkadda shatiga haysata.
   j) haddii la billaabo dacwad ku saabsan kicidda maaliyadeed ee shirkadda shatiga haysata.
2. Haddii ay dhacdo in saamilayda Shirkad Caymis ay codsadaan in lagala noqdo shatiga, Saamilayda iyo Shirkadda Caymisku,waa inay soo gudbiyaan qorshe lagu ilaalinayo danaha ka-qeyb-galayaasha iyo kuwa deynta ku sheeganaya si looga ansixiyo Bankiga.
3. Haddii Bankigu uu ansixiyo qorshaha la soo jeediyay, waa inuu bilaabo

habka rasmiga ah ee lagu joojinayo shatiga, isla markaana Shirkadda Caymisku ma fulin karto hawl caymis oo cusub.

4. Marka uu bankigu shatiga kala noqdo, bankigu waa in uu shirkadda shatiga haysata ka tirtiraa diwaanka hawl-wadeenada caymiska ama dhexdhexaadiyeyaasha Caymiska ee rukhsadda haysta.

## Qodobka 41aad
## Joojin Shati

1. Bankigu waa inuu baabi'iyaa shatiga xaaladaha soo socda:
   - b) Haddii shirkadda Caymisku ay ku xad-gudubto ku-dhaqanka shareecada ama maamulka sida ay go'aamiyeen Golaha Sare ee Shareecada;
   - t) Haddii shirkadda Caymisku ku dhaqmi waydo rukhsadda muddo lix bilood ah oo ka billaabanaysa marka rukhsadda la siiyo, marka laga reebo in Bankigu u kordhiyo sababo dhab ah oo la qiimeeyay;
   - j) Haddii shirkadda Caymisku joojiso hawlaha Caymiska, iyadoo aan fasax laga haysan Bankiga;
   - x) Haddii Caymiyuhu si joogto ah ugu guuldaraysto inuu hayo hanti ka badan deymaha ku jira Sanduuqa Magdhawga Caymiska muddo ka badan lix bilood;
   - kh) Haddii shirkadda Caymisku ay bixiso macluumaad been abuur ah, marin- habaabin ah ama aan sax ahayn ama uu qariyay ama ku guul-darraystay inuu shaaciyo xaqiiqooyinka dhabta ah ee codsiga shatiga;
   - d) Haddii shirkadda Caymisku ku guuldaraysato inay u hoggaansanto shuruudaha xalka maaliyadeed sida ku cad sharcigan;
   - r) Haddii shirkadda Caymisku hawlaheeda caymis ay ku dhaawacdo danaha ka- qeyb-galayaasha;
   - s) Haddii shirkadda Caymisku ku guuldaraysato inay qabato qabanqaabada dhameystiran ee dib-u-caymiska;
   - sh) Haddii Qofka shatiga haysta lagu helo inuu jabiyay shuruudaha iyo nidaamka shatiga;
   - dh) Haddii shatiga la joojiyo arimo la xiriira dan guud;
   - c) Haddii shirkadda Caymisku diiddo inay aqbasho ka-qeyb-qaataha sabab aan caddayn;
   - g) Haddii ganacsiga Caymiskuka hor imaanayo qodobbada sharcigan tan iyo markuu shaqada bilaabay, ama ay caddaato inuu jebiyey

qodobbada sharcigan;

f) Haddii shirkadd Caymisku awoodi waydo ama ku guul-darraysato inay u hoggaansanto qodobbada sharcigan iyo dhammaan xeer-nidaamiyeyaasha kale ee Caymiska; iyo

q) Xaaladaha kale ee ku xusan sharcigan.

## Qodobka 42aad
## Shati-siinta Shirkadaha Ajaanibka ah

1. Sida uu dhigayo sharcigan, Caymiyaha ajnabiga ah wuxuu Bankiga ka heli karaa shatiga ganacsiga Caymiska.
2. Codsadaha ku xusan faqradda (1) ee qodobkan waxaa looga baahan yahay inuu la yimaado shahaado iyo shati uu ku lahaa dalka dibaddiisa, taasoo ay caddeeyeen mas'uuliyiinta safaaradahooda ee dalka Soomaaliya u jooga ama mas'uuliyiinta safaaradaha Soomaaliya u joogta dalalkaas, marka lagu daro dokumentiyada iyo macluumaadka looga baahan yahay sida uu sharcigu qabo.

## Qodobka 43aad
## Wakiillo Shirkad Caymis Shisheeye

1. Shirkadda Caymiska ee ajnabiga ah oo haysata shahaado xasilooni maaliyadeed oo ay ansixiyeen hay'adooda kormeer ee waddankooda ka diiwaan-gashan, wuxuu si ku-meel-gaar ah ugu shaqayn karaa wakiil ahaan hal sano ka dib marka uu helo shatiga.
2. Hay'adda ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, waxay hal sano ka dib heli kartaa
rukhsad hawl-fuliye Caymis si waafaqsan qodobbada sharcigan.

## Qodobka 44aad
## Laamaha Shirkadaha Caymiska

1. Shirkadda Caymiska waxay xafiisyo laameed ka samaysan kartaa dhammaan gobolada Soomaaliya iyo dalka dibaddiisa iyadoo ay ku xiran tahay oggolaanshaha qoraal ee Bankiga.
2. Caymiyuhu waa inuu u soo gudbiyaa dokumentiyada sugan ee loo baahan yahay ugu yaraan 30 (sodon) maalmood ka hor inta aan la bilaabin xafiis laan ah iyadoo la raacayo sharcigan.
3. Bankigu wuxuu ku ansixin karaa samaynta laamaha 30 (sodon) maalmood gudahood ka dib marka uu qiimeeyo heerka maaliyadeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

xasiloonida maaliyaddeed iyo raasamaalka Shirkadda Caymiska sida uu dhigayo sharcigan.

### Qodobka 45aad
### Wakiil Sharci

Codsade kasta oo raba inuu shati ka qaato Bankiga waa inuu keenaa la-taliye sharci si uu u habeeyo nidaamka helidda shatiga.

## CUTUBKA SHANAAD
## RUKHSAD-SIINTA IYO KORMEERKA DHEX-DHEXAADIYEYAASHA

### Qodobka 46aad
### Dhex-dhexaadiyeyaasha

1. Dhex-dhexaadinta takaful/caymis waxaa loola jeedaa hawsha soo-bandhigidda, soo-jeedinta iyo fulinta hawlaha kale ee diyaarinta ah ilaa inta laga gelayo heshiiska qandaraasyada caymiska/takaaful ama dib-u-cayminta, iyo bixinta kharashaadka inta lagu jiro muddada heshiiskaas, gaar ahaan kiiska sheegashooyinka.
2. Rukhsadda ganacsi ee dhex-dhexaadiyaha Caymiska wuxuu Bankigu ku bixin karaa mid ka mid ah qeybahan soo socda:
    - b) Shatiga dillaaliinta caymiska/takafulka;
    - t) Shatiga wakiilka caymiska/takafulka;
    - j) Shatiga la-taliye caymis/takaful;
    - x) Shatiga hagaajiyaha khasaarada;
    - kh) Shatiga sahmiyaha;
    - d) Shatiga dilaaliinta dib-u-caymiska;
3. Qofka doonaya inuu ganacsi u sii wado isaga oo ah dhex-dhexaadiye caymis/ takaaful waa inuu soo gudbiyaa arji si sax ah loo soo buuxiyey oo qeexan oo ay la socdaan dukumentiyada kale ee lagu qeexi doono xeer-nidaamiye kasoo baxa Bankiga.
4. Qofku waa in aanu ganacsi dhex-dhexaadiye caymis/takaaful ah ka dhex samayn karin Soomaaliya isagoo aan haysan oggolaansho ama shati ku habboon.

## Qodobka 47aad
## Rukhsad-siin dhex-dhexaadiyeyaal

1. Bankigu wuxuu siinayaa rukhsadda dhex-dhexaadiye Caymis marka uu ku qanco in dhex-dhexaadiyaha takaful buuxiyay shuruudaha bixinta shatiga.
2. Codsadaha doonaya in loo sharciyeeyo dhex-dhexaadiye Caymis waa inuu bixiyaa khidmad go'an oo ah codsiga is-diiwaan-gelinta iyo kharashka cusboonaysiin xiliyeedka.
3. Shatigu waa inuu si cad u sheegaa qeybta dhex-dhexaadiyaha Caymiska.
4. Bankigu waa inuu soo saaraa xeer-nidaamiye qeexaya qeybaha dhex-dhexaadiyaha Caymiska, iyo sidoo kale shuruudaha shatiga, habraaca, kharashaadka iyo shuruudaha kale ee uu u baahan yahay dhex-dhexaadiye Caymis si loogu oggolaado inay ganacsigooda u fuliyaan qeyb kasta oo ah dhex-dhexaadiye caymis.

## Qodobka 48aad
## Jiritaanka Shatiga

Shatiga dhex-dhexaadiyaha takaful wuxuu jiri karaa muddo 1 sano ah waxaana la cusboonaysiin karaa sanadka xiga.

## Qodobka 49aad
## Diiwan-gelin Dhex-dhexaadiye

1. Bankigu waa inuu sameeyaa oo uu hayaa diiwaanka cusboonaysiinta dhammaan dhexdhexaadiyeyaasha caymiska/takafulka ee la oggolyahay iyo kuwa shatiga haysta.
2. Diiwaanka la cusboonaysiiyay ee dhammaan dhex-dhexaadiyeyaasha caymiska/takaaful ee la oggol yahay iyo kuwa shatiga haysta waa inay ahaataa mid lagu daabacay mareegta Bankiga.

## Qodobka 50aad
## Magacaabista Shaqaalaha Muhiimka ah

1. Magacaabista shaqaalaha muhiimka ah ee dhexdhexaadiyeyaasha waxay dhaqan-gelayaan ka dib marka lahelo oggolaanshaha Bankiga oo qoraal ah.
2. Bankiga ayaa soo saaraya xeerar qeexaya shahaadooyinka looga baahan

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

yahay dhexdhexaadiyaha takaaful/caymis.

## Qodobka 51aad
## Xakameynta kale

Bankigu wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiyeyaasha dhex-dhexaadiyeyaasha caymiska/takaful ee la xiriira maareynta tabarucaadka, qiimaha komishanka iyo khidmadaha kale.

## Qodobka 52aad
## Warbixinta Maaliyadeed ee Dhex-dhexaadiyayaasha

1. Qoraal Xisaabeedka caymiska/takaafulka dhex-dhexaadiye waa inuu waafaqo Heerarka Warbixinta Maaliyadeed ee Caalamiga ah (IFRS) iyo sidoo kale Ururka Xisaabinta iyo Hanti-dhawrka ee Hay'adaha Maaliyadda Islaamiga ah (AAOIFI).
2. Wakiillada Caymiska ah, xisaabaadka amaanada ee ay ku shaqeeyaan waa inay waafaqaan mabaadi'da xisaabaadka ee ku xusan farqada (1) ee qodobkan.

## Qodobka 53aad
## Ilaalinta Xisaabaadka Dhex-dhexaadiyayaasha

1. Dhex-dhexaadiyaha Caymiska waa inuu xisaabaadkiisa u ilaaliyaa si waafaqsan
mabaadi'da xisaabaadka iyo sida uu Bankigu u amro.
2. Dhex-dhexaadiyaha Caymiska waa inuu u soo gudbiyaa bankiga xisaab-xirkiisa la baaray muddo saddex (3) bilood gudahood ah kadib dhammaadka sannad- maaliyadeedka.
3. Bankigu waxa uu soo saari karaa xeer-nidaamiye qeexaya:
   b) qaabka iyo habka loo hayo diiwaannada xisaabaadka;
   t) diiwaannada lagu hayo qeyb ka mid ah diiwaannada xisaabaadka dhex-dhexaadiyaha;
   j) muddada lagu haynayo diiwaannada xisaabaadka;
   x) shuruudaha kale ee lagu dabaqi karo diiwaannada xisaabaadka.



## Qodobka 54aad
## Banka-takaful

1. Bankiga doonaya inuu iibiyo, suuq-geeyo ama qeybiyo badeecadaha caymiska waa inuu soo codsadaa shatiga Banka-takaful.
2. Bankigu waa inuu soo saaraa xeer-nidaamiye khuseeya Banka-takaful.

## Qodobka 55aad
## Awooda Kormeerka

Dhex-dhexaadiyaha takaful waa in lagu sameeyaa dib-u-eegis kormeer, oo ay ku jiraan kormeeridda goobta iyo la socodka ka baxsan goobta. Bankigu waxaa laga rabaa inuu cayimo macluumaadka ujeeddooyin kormeer goobta ah.

# CUTUBKA LIXAAD
# MAAMULKA HAWLAHA TAAKAFUL

## Qodobka 56aad
## Maamulka iyo Qaab-dhismeedka Shirkadda Caymiska

1. Shirkadda Caymiska waa inay lahaataa qaab-dhismeedka maamul ee soo socda:
   b) Golaha Saamileyda
   t) Golaha Maamulka
   j) Guddiga Maamulka
   x) Madaxa Maaliyadda
   kh) Sarkaalka Sharciyada iyo u-hogaansamidda
   d) Sarkaalka Warbixinta ee Nidaamka Lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada
   r) Shaqada hanti-dhawrka gudaha
   s) Shaqada maareynta khatarta
   sh) Saxiixa Akjuweeri
   dh) Guddiga Shareecada
   k) Sarkaalka Ku-dhaqanka Shareecada

2. Shirkadda Caymiska waa inay ka qaadataa oggolaanshaha ka hor xirfadlayaasha aan kor ku soo xusnay inta aan la qaadan.
3. Bankigu wuu aqbali karaa ama wuu diidi karaa magacaabista xirfadlayaasha kor ku xusan ama wuxuu codsan karaa macluumaad dheeraad ah.
4. Bankigu waa inuu diidmadiisa qoraal ahaan ugu soo bandhigaa Shirkadda Caymiska ee ay khuseyso.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 57aad
## Doorka iyo Shaqada Golaha Maamulka

1. Golaha agaasinku waa in ay kormeeraan maamulka oo ay siiyaan tilmaamaha hawl-wadeenka caymiska/takaful.
2. Shirkadda caymiska lama siin karo shatiga ilaa ugu yaraan saddex-meelood laba meelood xubnaha Golaha Agaasimayaasha ay yihiin muwaadiniin Soomaaliyeed.
3. Golaha Agaasimayaashu waa in ay ka koobnaadaan ugu yaraan 5 (shan) xubnood.

## Qodobka 58aad
## Madaxa Fulinta iyo Ku-xigeennada

1. Madaxa fulinta ayaa u xilsaaran hagidda hawlaha Shirkadda caymiska iyo hoggaaminta golaha maamulka.
2. Shirkadda Caymisku waxay u magacaabi kartaa hal ama in ka badan oo ku- xigeenno ah madaxa fulinta.

## Qodobka 59aad
## Hanti-dhawraha Dibadda

1. Shirkadda Caymiska waa in ay magacawdaa hanti-dhawre dibadda ah oo baara hawlaha iyo maaliyadda Shirkadda si waafaqsan sharcigan.
2. Hanti-dhawraha dibaddu waa inuu dib-u-eegis ku sameeyaa warbixinnada dhabta ah ee soo bandhigaya khataraha muddada dhow ama imaan kara mustaqbalka ee soo food saaraya Shirkadda, waana in shirkadda la siiyaa nuqullo ka mid ah warbixinnadan waqtigii loogu tala-galay.
3. Caymiyuhu waa inuu ogaysiiyaa Bankiga marka Shirkaddu doonayso inay ka joojiso shaqada hanti-dhawrkooda isla markaana sharraxaad ka bixiso go'aan gaaridaas ama si la mid ah haddii uu is-casilo hanti-dhawruhu, waana in hantidhawr cusub lagu magacaabaa saddex bilood gudahood marka uu hanti- dhawrkii hore ka tago.
4. Shirkadda Caymiska waa inay ka helaan oggolaansho qoraal ah Bankiga ka hor inta aysan magacaabin hanti-dhawrkeeda cusub.
5. Isagoo tixgelinaya soo-jeedinta magacaabista hanti-dhawraha sida ku cad qodobkan, Bankigu wuxuu ogaanaya khibradda, aqabka, iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

sumcadda hanti- dhawrka iyadoo la eegayo baaxadda iyo xaddiga ganacsiga Caymiska iyo sidoo kale darajada madax-bannaanida hanti-dhawraha ee maamulka Shirkadda Caymiska ee xisaab-xidhkiisa.

6. Hanti-dhawraha iscasilay ama hanti-dhawraha shaqada laga joojiyay waa inuu qoraal ku ogeysiiyaa sababaha is-casilaadda ama joojinta Bankiga muddo 30 (soddon)maalmood gudahooda ah oo ka bilaabanta dhacdada.

## Qodobka 60aad
## Saxiix Akjuweeri

Shirkadda Caymisku waa in ay magacawdaa Akjuweeri ama raadsataa adeegyada shirkad Akjuweeri ka dib marka ay oggolaansho qoraal ah ka hesho Bankiga.

## Qodobka 61aad
## Qoritaan iyo Joojin Shaqaale

1. Shirkadda Caymiska waa inay shaqaaleysiinama shaqo-joojin ku sameyn kartaashaqaalaheeda ayadoo raacaysa sida Bankigu farayo.
2. Shirkadda Caymiska iyo Hawl-wadeennada caymiska waa inay bixiyaan tababar ku filan oo ku habboon dhammaan shaqaalahooda.
3. Bankigu wuxuu fari karaa tababar kasta oo gaar ah ama takhasus kasta oo gaar ah.

## Qodobka 62aad
## Qodobbada Asaasiga ah ee Shirkadda

Hawl-wadeenka caymiska/takaafulka waa inay maamulaan hawlahooda iyagoo raacaya Qodobbada asaaska Shirkadda.

## Qodobka 63aad
## Guddiga Shareecada

1. Guddiga Shareecada waxaa lagu magacaabayaa go'aan ka soo baxa saamileyda, waxaana ansixinaya Bankiga.
2. Guddiga Shareecada wuxuu ka koobnaan doonaa 3 (saddex) ilaa 5 (shan) xubnood.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3. Xubnaha Guddiga waxay mid ka mid ah u dooranayaan guddoomiye, mid kalena guddoomiye ku-xigeen.
4. Qof aan lahayn shakhsiyad qaanuuni ah oo keliya ayaa xubin ka noqon kara Guddiga Shareecada.
5. Guddida Shareecada waxay u warbixinaysaa shirka guud ee saamilayda shirkadda Caymiska.

## Qodobka 64aad
## Shuruudaha Xubinta Guddida Shareecada

1. Shirkadda Caymiska waa inay hubiso in xubin kasta oo ka tirsan Guddiga Shareecada ay buuxisay shuruudaha soo socda:
   - b) inuu fayow yahay jir ahaan iyo maskax ahaan;
   - t) inuu yahay Muslim kuna dhaqma shareecada;
   - j) inuu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay, takhasuska shareecada ama culuumta islaamka ah;
   - x) waa inuu ku xeel-dheer yahay Fiqh Almucaamalatka; iyo
   - kh) waa inuu aqoon iyo khibrad u leeyahay takaaful iyo dhaqamada maaliyadeed ee takaaful.
2. Bankigu wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiye hagaya Guddiga Shareecada, magacaabistiisa iyo u-qalmitaanka xubnihiisa, isla markaana wuxuu dalban karaa shuruudo dheeraad ah.

## Qodobka 65aad
## Diidmada Magacaabista iyo Joojinta Xubinta Guddiga Shareecada

1. Bankigu wuu diidi karaa magacaabista ama wuu joojin karaa xubin kasta oo Guddiga Shareecada ah oo ku guul-dareysta inuu buuxiyo shuruudaha.
2. Bankigu wuu diidi karaa magacaabista ama ka joojin karaa shakhsi xubinnimada Guddiga Shareecada marka uu shakhsiga:
   - b) Uusan u qalmin tayo ahaan iyo ku haboonaansho ahaan;
   - t) Uusan maskaxiyan fayoobayn;
   - j) xaalad caafimaad darro oo soo wajahday awgeed uusan gudan karin xilkiisa.
   - x) lagu caddeeyo inuu kacay (musallafay) ama uusan awoodin bixinta deynta.
   - kh) Haddii xubin ka tirsan guddiga shareecada uu ka baaqsado 50% shirarka guddiga shareecada sanad gudihiis iyadoon sabab ku filan

loo helin.

3. Haddii Bankigu diido ama joojiyo magacaabista shakhsiga Guddiga Shareecada, Shirkadda Caymisku waa inay si degdeg ah u joojisaa magacaabista qofkaas.

## Qodobka 66aad
## Xaddidaada Xubinimada Guddiga Shareecada

1. Xayiraadaha guud ee soo socda ayaa lagu dabaqi doonaa xubinnimada Guddiga Shareecada:
    - b) Shakhsigu waa in aanu xubin ka noqonin wax ka badan saddex guddi oo shareecada ah ee Shirkadaha Caymiska ee Soomaaliya.
    - t) Xubinta Guddiga Shareecada ee Shirkadda Caymiska kama mid noqon karo Guddiga Sare ee Shareecada ee Bankiga.
    - j) Xubinta Guddiga Shareecada ee Shirkadda Caymiska waa in aanay noqon agaasime, hawlwadeenka maamulka fulinta ama saami-qeybsiga Shirkadda Caymiska.
2. Shakhsiga ka mid noqonaya Guddiga Shareecada waa in aan u shaqayn muddo ka badan 9 sano hal shirkad oo takaaful ah.

## Qodobka 67aad
## Waajibaadka Guddiga Shareecada

1. Guddiga Shareecada wuxuu yeelanayaa xilalka iyo shaqooyinka soo socda:
    - b) wuxuu ilaalinayaa ku dhaqanka shareecada guud ee hawlaha Caymiska.
    - t) wuxuu dib-u-eegis ku samaynayaa qorshayaasha degsan, adeegyada, hab- raacyada hawl-gallada iyo maaraynta ganacsiga Caymiska si loogu hoggaansamo shareecada.
    - j) wuxuu kala talinayaa guddiga maamulka arrimaha la xiriira ku dhaqanka shareecada ee socodsiinta ganacsiga Caymiska.
    - x) Guddoomiyaha ama guddoomiye ku-xigeenka guddiga shareecada waa in loo oggolaadaa inuu ka soo qeyb galo shirka guud iyo shirarka guddiga si ay uga tashadaan shareecada ama la wadaago ra'yiga Guddiga Shareecada.
    - kh) wuxuu kala talinayaa Shirkadda Caymiska xagga Shareecada haddii khilaaf ka yimaado Sharci-dhawrka shareecada ee Hawlaha Shirkadda.

d) wuxuu kala talinayaa Shirkadda Caymiska xaga Shareecada si uu u saxo wixii ka soo baxa Sharci-dhawrka shareecada.

2. Guddiga Shareecadu waa in ay fikradahooda iyo talooyinkooda ku soo gudbiyaan qaab qoraal ah.
3. Xubnaha Guddiga Shareecada waa inay xafidaan dhammaan macluumaadka.

## Qodobka 68aad
## Madax-bannaanida Guddiga Shareecada

1. Qofna looma oggolaan karo inuu saameyn ku yeesho Guddiga Shareecada go'aankooda.
2. Guddida Shareecada waa inay qaataan dowr firfircoon oo madax-banaan oo la xiriirta arrimaha shareecada ee Shirkadda Caymiska.
3. Si ay u gutaan waajibaadkooda, Guddiga Shareecada waa in ay ka helaan Shirkadda Caymiska macluumaad dhammaystiran, waafi ah waqti ku habboon ka hor kulanka dhammaan shirarka Guddiga.

## Qodobka 69aad
## Oggolaanshaha Guddiga Shareecada

Marka shirkadda Caymiska looga baahan yahay in ay dokumenti u gudbiso Bankiga, kaasoo u baahan oggolaansho ka hor Guddiga Shareecada, Shirkadda Caymisku dokumentiyada loo baahan yahay, waa in ay ku soo lifaaqdaa oggolaanshaha Guddiga Shareecada.

## Qodobka 70aad
## Sarkaalka Ku-dhaqanka Shareecada

1. Shirkadda Caymiska waa inaylahaataa sarkaal u hoggaansan shareecada oo uga mas'uul ah Guddigooda Shareecada arimaha ku saabsan ku-taabba-gelinta Ra'yiga Guddiga Shareecada.
2. Saraakiisha u hoggaansan shareecada waa inay aqoon ku filan u leeyihiin Fiqh Almucaamalat.
3. Bankigu wuxuu amri karaa qaadasha saraakiil badan oo ah u-hoggaansanaanta shareecada taasoo ku xiran baaxadda hawlaha ganacsi ee Shirkadda Caymiska.
4. Sarkaalka u-hoggaansanaanta Shareecada waa inuu noqdaa xiriiriyaha u dhexeeya Guddiga Shareecada iyo maamulka Shirkadda Caymiska.
5. Sarkaalka u-hoggaansanaanta Shareecada wuxuu ahaanayaa xoghayaha

guddiga shareecada.

6. Sarkaalka u-hoggaansanaanta Shareecada waa inuu qaban-qaabiyaa shirarka Guddiga Shareecada oo uu xafidaa diiwaannada go'aamada, ra'yiga, tilmaamaha, oggolaanshaha iyo dokumentiyada.
7. Sarkaalka ku dhaqanka shareecada waa inuu si joogto ah u diyaariyaa una fuliyo qorshayaasha dib-u-eegista shareecada, warbixinna u gudbiyaa guddiga shareecada iyo maamulka sare.

## Qodobka 71aad

## Hanti-dhawraha Shareecada Ka Madax-bannaan Shirkadaha

1. Caymiyuhu wuxuu magacaabayaa hanti-dhawraha shareecada oo madax- bannaan oo dibadda ah.
2. Dowrka hanti-dhawraha shareecada dibadda waa inuu dib-u-eegis ku sameeyaa xisaabaadka, qandaraasyada iyo dokumentiyada kale si loo hubiyo inay ku dhaqmaan shareecada, Hanti-dhowruhu waa inuu sidoo kale qiimeeyaa hawlaha caymiska/takafulka si loo hubiyo u-hoggaansanaanta mabaadi'da iyo tilmaamaha Islaamka.
3. Hanti-dhawraha shareecada dibadda waa inuu si weyn u fahamsan yahay sharciga Islaamka, mabaadi'da xisaabaadka maaliyadeed iyo halbeegyada hanti- dhawrka, sidoo kale waa inay lahaadaan xirfado gorfayn iyo isgaarsiin heer sare ah, maadaama ay inta badan ku qasban yihiin inay natiijooyinkooda u soo bandhigaan Guddiga Maamulka.
4. Shirkadda caymiska waa inuu hirgeliyaa qorshe-hawleed sixid oo uu raacayo hab- raaca guddiga shareecada.
5. Sarkaalka u-hogaansanaanta shareecada waa inuu ka warbixiyaa fulinta qorshe- hawleedka sixitaanka Guddiga Shareecada.
6. Shirkadda caymiska waa inay soo gudbisaa warbixinta Hanti-dhawrka Shareecada iyo qorshe-hawleedka sixitaanka muddo (30) maalmood gudahooda oo ka bilaabmaya maalinta uu helo warbixinta Hantidhawrka Shareecada iyo warbixinta fulinta marka la saxo natiijada.
7. Inta jeer ee la qabanayo baaritaanada shareecada dibadda waa in lagu qeexaa Xeer- nidaamiyaha.

## Qodobka 72aad

## Dhaqan-gelinta Hannaanka Shareecada

Madaxa fulinta, guddiga maamulka iyo guddiyada ay khusayso ee Shirkadda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Caymiska ayaa mas'uul ka ah fulinta go'aamada guddiga shareecada.

### Qodobka 73aad
### Wareejinta, Isku-dhafka iyo La-wareegidda Ganacsiga Caymiska

1. Dhammaan ama qeyb ka mid ah ganacsiga Caymiska ee Shirkad ku diiwaan- gashan sharcigan, waxaa lagu wareejin karaa Shirkad kale oo ku diiwaangashan nooc caymis ama noocyo caymis.
2. Kahor intaan qeyb ka mid ah ganacsigeeda lagu wareejin shirkad kale, Shirkadda Caymisku waa inay heshaa oggolaanshaha Bankiga oo qoraal ah.
3. Bankigu waa inuu soo saaraa xeer-nidaamiye khuseeya hab-raacyada, war- gelinnada, daah-furka Shirkadda Caymiska iyo shuruudo kasta oo kale haddii la oggolaado wareejinta, isku-dhafka iyo la-wareegidda ganacsi kasta oo Caymis ah.

## CUTUBKA TODOBAAD
## NOOCYADA CAYMISKAKA

### Qodobka 74aad
### Noocyada Caymiska

1. Shirkadaha Caymisku waxay bixin karaan Caymiska Qoyska iyo Caymiska Guud ka qeyb-galayaasha si waafaqsan qodobbada sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa iyo hab-raacyada kale.
2. Shirkadaha Caymisku waxay bixin karaan adeeg-caymisyo kala duwan oo hoos yimaada Caymiska qoyska iyo Caymiska Guud, oo ay ku jiraan kuwa qiimaha jaban iyo kuwa loo isticmaalo Khadka Caymiska, ka dib markay oggolaansho ka helaan Bankiga si waafaqsan qodobbada sharcigan, xeer-nidaamiyeyaasha iyo hab-raacyada kale.

### Qodobka 75aad
### Qaababka Hawl-gelinta Caymiska

1. Bankigu wuxuu dooran karaa hal ama in ka badan oo ah noocyada Caymiska ee dalka.
2. Shirkadda Caymisku waa inay ka hesho oggolaansho qoraal ah

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

Bankiga ka hor inta aysanbilaabin ama wax ka beddelin nooc kasta oo caymis ah.

3. Keliya hab-raaca nooca caymis ee uu soo xushay Bankiga, waa inuu qaataa hawl- wadeenka Caymisku.
4. Shirkadda Caymiska waa inay haysataa dokumenti la xiriirta qaabka hawl-gelinta ee la isticmaalo, oo ay ku jiraan:
   - b) Shuruucda Caymiska;
   - t) Shuruucda maaliyadda;
   - j) Shuruucda maalgashiga;
   - x) Shuruucda haraaga dheeraadka ah;
   - kh) Shuruucda qard-xasan;
   - d) Shuruucda khidmadda hawl-wadeenka Caymiska;
   - r) Qaabeynta iyo habraaca qiimaha;
   - s) Habraaca suuqgeynta;
   - sh) Habraaca Keydinta; iyo
   - dh) Macluumaad kasta oo kale oo Bankigu u baahan yahay.

## CUTUBKA SIDDEEDAAD
## DHAQAALAHA CAYMISKA/TAKAAFULKA

### Qodobka 76aad
### Sanduuqa Saamileyda

1. Hawl-wadeenka caymiska/takafulka waa inuu abuuraa oo ilaaliyaa Sanduuqa Saamileyda.
2. Sanduuqa saamilayda waa inuu ka koobanadaa raasamaal la bixiyay iyo faa'iidada aan loo qeybin saamilayda.
3. Sanduuqa saamilayda waa in loo qabtaa si waafaqsan siyaasad ay ansixiyeen Guddigiisa Agaasimayaasha, Bankiga iyo talooyinka hawl-wadeennada akjuweeriga.
4. Marka uu hawl-wadeennada caymiska/takaafulka u sameeyo caymiska qoyska iyo mid guudba sida shirkad isku dhafan, hawl-wadeenka caymisku/takaaful waa inuu hubiyo in si daahfuran lagu bixiyo dakhliga la xiriira Sanduuqa saamilayda iyo ka bixista mid kasta oo ka mid ah caymiska guud iyo qoyska takaful, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn khidmadaha, faa'iidada maal-gashiga, horumarinta iyo dib-u-bixinta Qard-xasan.
5. Faa'iidada saamilayda waa in lagu saleeyaa qaabka takaful ee ay qaateen hawl- wadeennada takaaful oo uu bankigu ansixiyo wuxuuna ka koobnaan karaa:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

b) kharashka hawlwadeenka Takaafulka.
t) faa'iido laga helo hawlaha maal-gashiga.
j) ujuurada/khidmada dhiiri-gelinta.
x) kharash kasta oo kale.

6. Kharashaadka Sanduuqa Saamilayda waa inuu ka koobnaadaa dhammaan kharashaadka la xiriira hawl-wadeenka caymiska/takaafulka, oo ay ku jiraan dhammaan khidmadaha suuq-geynta, maamulka iyo hawl-gelinta.

## Qodabka 77aad
## Qaadashada Waajibaadka

Saamilayda waa in ay fuliyaan dhammaan bixinta sheegashada Sanduuqa Mag-dhawga Caymiska si shuruud la'aan ah, balse qaansheegadka ay arrintani khusayso waa inay ka badnaan Sanduuqa Saamileyda.

## Qodobka 78aad
## Sanduuqa Caymiska ee ka Qeyb-galayaasha

1. Shirkadda Caymiska waa inay ilaalisaa Sanduuqa Caymiska Ka-qeyb-galayaasha ee tabarucaadka u soo xarooda caymiska qoyska iyo caymiska Guud ee Shirkadda, kuna shubtaa akoon u gaar ah oo khuseeya xisaabaadka nooc kasta oo caymis ah.
2. Dhammaan tabarucaadyada la qabto ee Sanduuqa Caymiska ka-qeyb-galayaasha waa in loo qeybiyaa qeybaha soo socda oo kala ah:
   b) qeyb la xiriirta cayminta khatarta;
   t) qeybta khidmadaha Shirkadda Caymiska; iyo.
   j) Keydinta la xiriirta haddii ay tahay Caymiska qoyska.

3. Cayimuhu waa inuu lahaadaa siyaasadda Sanduuqa Caymiska ee Ka-qeyb- galeyaasha, taasoo noqon doonta mabaadi'da iyo xeerarka ganacsiga Caymiska ee guud ahaan la oggol yahay ama dib-u-habeyn wax looga beddelay iyadoo uu hagayo Guddiga Shareecada ee Shirkadda Caymiska iyo Bankiga.
4. Guddiga Shareecada iyo Bankigu waa inay sidoo kale ansixiyaan isbeddel kasta oo ku yimaada xeerarka Sanduuqa Caymiska ka-qeyb-galayaasha.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 79aad
## Go'aaminta Kharashka Shirkadda Caymiska

1. Kharashka hawl-wadeenada caymiska/takafulka waa in hore loo sii hagaajiyaa waxaana loo sheegi karaa boqolkiiba inta ay ka tahay khidmada qaaraanka,marka la dejiyan waa inaan wax laga beddelin muddada qandaraaska takaafulka, waana in si cad loogu sheegaa heshiiska.
2. Kharashka Shirkadda Caymiska laguma go'aamin doono wax khuseeya ama uu noqon doono mid ku tiirsan lacagta ka soo harta kharashka ka soo hara sanduuqa Magdhawga caymiska/takafulka.
3. Kharashka Shirkadda caymisku waa inuu daboolaa wadarta guud ee qeybaha soo socda:
    - b) kharashaadka maamulka;
    - t) kharashyada qeybinta, oo ay ku jiraan kharashka dhex-dhexaadiyaha iyo kharashaadka wakiillada;
    - j) kharashyada kale ee ku jira samaynta adeegyada caymiska/takafulka ee la soo bandhigi karo; iyo
    - x) arimaha macquulka ah ee ku habboon faa'iidada hawl-galka.
4. Shirkadda caymiska waa inay xaqiijisaa in maamulka, qeybinta iyo kharashaadka kale ee aan kor ku soo sheegnay aan laga bixin Sanduuqa Mag-dhawga ka- qeybqaataha balse laga bixiyo Sanduuqa Saamileyda.
5. Kharashka Shirkadda caymiska waxaa caddaynaya hawl-wadeenka akjuweeriga takafulka ka dibna waxaa ansixin doona guddiga shareecada iyo bankiga.
6. Aragtidiisa xirfadeed, hawl-wadeenka akjuweeriga waa inuu xaqiijiyaa in tabarucaadka haray ee la siinayo Sanduuqa Mag-dhawga Caymiska/Takafulka ay ku filan yihiin inay daboolaan khataraha.

## Qodobka 80aad
## Sanduuqa Magdhawga Caymiska

Shirkadda Caymiska waxaa laga yaabaa inuu u abuuro hal sanduuq oo mag-dhawga Caymiska ah ama dhawr sanduuq oo mag-dhawyada Caymiska ah ee noocyada caymisyo kala duwan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 81aad
## Soo-gelitaanka Dakhliga Sanduuqa Magdhawga Caymiska

1. Soo-gelitaanka dakhliga ee Sanduuqa Magdhawga Caymiska wuxuu ka kooban yahay kuwan soo socda:
   - b) qeybaha tabarucaadda khatarta ah ee ay soo biiriyaan ka-qeyb-qaatayaasha.
   - t) magdhawga laga helo Shirkadaha Dib-u-caymiska.
   - j) khidmadda ay bixiso Shirkadaha Dib-u-caymiska
   - x) Qard-xasan haddii ay wax ka dhinaato sanduuqa Magdhawga Caymiska.
   - kh) deeq kasta oo ay bixiyaan saamilaydu.

## Qodobka 82aad
## Bixinta Magdhawga Caymiska

1. Ka bixidda Sanduuqa magdhawga Caymiska waa in loogu talo-galaa:
   - b) kharashka sheegashooyiinka la siiyay ka-qeyb-galayaasha;
   - t) kharashaadka ku baxa Dib-u-caymiska; iyo
   - j) kusoo celinta Qard-xasanka Sanduuqa Saamileyda.

## Qodobka 83aad
## Keydka Sanduuqa Cayminta

1. Shirkadaha Caymiska waa in ay keyd ka sameeyaan Sanduuqa Magdhawga Caymiska marka ay soo jeediyaan Akjuweeriga shirkadda.
2. Keyd ka sameynta Sanduuqa Magdhawga Caymiska waa inuu ka koobnaadaa dhammaan ama mid ka mid ah keydadka soo socda ama isku darka labo ama ka badan kuwan ama keydka kale sida Akjuweeriga shirkaddu u baahan karo in la sameeyo:
   - b) Keydka loogu talo-galo sheegashooyinka taagnaan kara ama aan weli la xalin;
   - t) Keydka qaaraanka ee aan la kasban;
   - j) Keyd la galay balse aan la sheegin;
   - x) Keyd la galay balse aan sidii la rabay loo sheegin;
   - kh) Keydka yaraanta ama nusqaanta;
   - d) Keydadka ku talo-galka lama filaanka;
   - r) Keydadka si loo daboolo deymaha mustaqbalka ee hoos yimaada adeegyada Caymiska Qoyska;
   - s) Keydka Qard-xasanka; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
الجمهورية الفيدرالية الصومال
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

sh) Keydka isku-jaangoynta dheeraadka ah.

## Qodobka 84aad
## Hantida Sanduuqa magdhawga Caymiska

1. Caymiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in hantida Sanduuqa magdhawga Caymiska ay ku filan tahay inay daboosho deymaha isla markaana ay kaafin karto khataraha ganacsiga Caymiska, iyadoo la tixgelinayo arrimaha soo socda:
   b) kobcinta hantida;
   t) caddeynta hantida;
   j) suuq-geynta hantida;
   x) iskudhigga muddada iyo lacagta.

## Qodobka 85aad
## Sanduuqa Maal-gelinta ee Caymiska

1. Sanduuqa Maalgelinta Caymiska waa in loo abuuraa qeybta keydka ee Tabarucaadka ka-qeyb-qaatayaasha ee ku xiran Caymiska qoyska.
2. Caymiyuhu wuxuu u abuuri karaa hal sanduuq oo maalgelineed oo Caymiska ah ama dhawr maalgelineed oo Caymiska ah oo loogu talo-galay caymisyada kala duwan.
3. Hantida ku jirta sanduuqa Maalgelinta Caymiska waxaa lagu maalgalin karaa hay'ad maaliyadeed oo la aqoonsan yahay ama ah qaab-maaliyadeed sida uu Bankigu u ansixiyay mabaadi'da Shareecada ee uu doorto hawl-wadeenka Caymiska iyadoo la raacayo ansixinta guddiga shareecada.
4. Qeyb ka mid ah faa'iidada hantida maalgelinta ama khidmad ama isku darka labadaba, iyadoo ku xiran qaabka maalgashigu yahay, waa in la siiyaa Shirkadda Caymiska, kaas oo ay go'aamin doonaan Akjuweeriga shirkadda isla markaana ay ansixiyaan Guddiga Shareecada.

# CUTUBKA SAGAALAAD
# QEYBINTA DHEERAADKA KHAASKA AH

## Qodobka 86aad
## Shuruucda Maareynta Dakhliga Dheeraadka Khaaska ah

1. Shirkadda Caymisku waa in ay ilaalisaa Shuruucda uu Bankigu u ansixiyay si uu u maareeyo lacagta dheeraadka ah ee Sanduuqa Magdhawga Caymiska oo ay la socdaan talooyinka Akjuweeriga

shirkadda iyo talada Guddiga Shareecada.

2. Haddii aan lagu diidin qoraal shan iyo toban maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta soo gudbinta, waxa loo qaadanayaa in la ansixiyo oo uu sii jiro.
3. Bankigu waxa uu diidi karaa shuruud kasta oo ka mid ah Shuruucda maaraynta dheeraadka ah; sidaa darteed, diidmadaa waa in ay u aqbashaa Shirkadda Caymisku sida uu Bankiga u dhigay.

## Qodobka 87aad
## Xeerarka Qeybinta Dheeraadka

1. Caymiyuhu waa inuu dhawraa tilaabooyinka soo socda marka la qeybinayo lacagta dheeraadka ah:
   - b) qeybinta dheeriga ah waxaa ku talinaya Akjuweeriga shirkadda, waxaana oggolaanaya Golaha Maamulka, waxaana ansixinaya Guddiga Shareecada;
   - t) qeybinta dheeriga ah waa in lagu saleeyaa Shuruucda Sanduuqa Magdhawga Caymiska iyo heshiiska Caymiska;
   - j) qeybinta dheeraadka ah waa in lagu saleeyaa wadarta qiimaynta deymaha sida uu caddeeyey Akjuweeriga shirkadda iyo warbixin dhamaystiran oo la hubiyay;
   - x) Sanduuqa Magdhawga Caymiska waa in aanu hoos u dhicin ka dib marka la qeybiyo dheeraadka;
   - kh) lacagta dheeriga ah waa in loo qeybiyaa si cadaalad ah;
   - d) dhammaan ka qeyb-galayaasha horay loo siiyey Magdhaw Caymis ma helayaan wax dheeraadka dakhliga ah muddadaas.

2. Bankigu wuxuu xad u samayn karaa, xeer-nidaamiye ahaan, lacagta dheeraadka ah ee loo qeybin karo hawl-wadeennada caymiska/takafulka.

## Qodobka 88aad
## Ra'yiga Akjuweeriga

1. Akjuweeriga shirkadda kuma talinayo qeybinta dheeraadka ah haddii, aragtidiisa xirfadeed uu u arko in dakhliga dheeraadka ahi ku sii jiro Sanduuqa Magdhawga Caymiska si uu u daboolo deymaha mustaqbalka.
2. Caymiyuhu waa inuu ku war-geliyaa Bankiga talooyinka Akjuweeriga

Shirkadda ee ku saabsan lacagta dheeraadka ah 15 (shan iyo tobon) maalmood gudahood.

3. Bankigu wuxuu diidi karaa ama aqbali karaa soo-jeedinta Akjuweeriga Shirkadda ee ku saabsan talo-soo-jeedintiisa dakhliga dheeraadka ah.

## CUTUBKA TOBNAAD
## QARD-XASAN (DEEN WANAAGSAN)

### Qodobka 89aad
### Adeegga Qard-xasan (Deen Wanaagsan)

1. Shirkadda Caymiska waa inay dejisaa nidaamka Qard-xasan si ay u daboosho khasaaraha ku dhaca Sanduuqa Magdhawga Caymiska.
2. Hoos u dhaca kharashaadka sanduuqa waxaa lagu kabayaa Qard-xasan, ka yimi Sanduuqa Saamileyda ama Sanduuqa Magdhawga Caymiska.
3. Shirkadda Caymiska waa inay dejisaa habraacyo lagu daboolayo khasaaraha ku dhaca Sanduuqa Magdhawga Caymiska iyadoo loo marayo Qard-xasan, waana in hab- raacyadu nidaamiyaan arrimaha soo socda:
   b) xaaladaha sababaya Qard-xasan;
   t) qeybinta dheeriga ka-qeyb-galayaasha ayadoo ay taagan tahay deynta Qard-xasanka;
   j) muddada ay tahay in Qard-xasanka la bixiyo;
   x) duruufaha keenaya inaan Qard-xasanka la bixin; iyo
   kh) wax kasta oo hoos u dhac ah iyo saamaynta ay Qard-xasanka ku leedahay ka- qeyb-galayaasha cusub ee imaan kara.

### Qodobka 90aad
### Xaaladaha Qard-xasan

1. Caymiyuhu kama saari karo adeegga Qard-xasan marka laga reebo in Sanduuqa Magdhawga Caymisku uu buuxiyo shuruudaha ku filnaanshaha adeegga Qard- xasan.
2. Haddii Shirkadda Caymisku ay joojiso hawlaheeda shaqo, sabab kastaba ha lahaatee, Qard-xasan kasta oo la siiyey Sanduuqa Magdhawga Caymiska waxaa loola dhaqmayaa sidii deeq la tabarucay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 91aad
## Dib-u-bixinta Qard-xasan

1. Wixii dheeri ah ee la ogaado waa in marka hore loo isticmaalo dib-u-bixinta Qard- xasan ka hor inta aan loo qeybin ka-qeyb-galayaasha.
2. Hawlwadeenka caymiska/takafulka waxaa looga baahan yahay inuu yeesho siyaasad ku saabsan sida loo soo celinayo Qard-xasan iyo in lagu daro habka lagu baaro xaaladaha ciladaha Qard-xasan.
3. Hawl-wadeenka caymiska/takafulka waa inuu ku war-geliyaa Bankiga muddo 7 (toddobo) maalmood gudahood ah haddii ay jirto khasaare ku yimaadda sanduuqa Magdhawga ka-qeyb-galayaasha, waana in Bankigu qiimeeyaa wax kasta oo keeni kara cilad.
4. Qard-xasan waa la laalayaa haddii Sanduuqa Magdhawga Caymiska/Takafulka uu awoodi waayo inuu ku bixiyo deynta muddo saddex sano gudahood ah khasaare joogto ah awgeed.
5. Cilad kasta oo ku saabsan dib-u-bixinta Qard-xasan waxaa lagu qeexayaa xeer- nidaamiye.

# CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD
# ADEEGYADA CAYMISKA

## Qodobka 92aad
## Adeeg Caymis oo Cusub

1. Shirkadaha Caymiska waa inay ka helaan oggolaansho qoraal ah Bankiga ka hor inta aysan soo saarin adeeg caymis oo cusub.
2. Shirkadda Caymisku waa inay xaqiijisaa in shuruudaha soo socda la buuxiyay ka hor inta aysan bixin adeegga caymis ee cusub;
   b) in adeegga cusubi uu ku yimid rabitaanka ganacsiga Caymiska sida uu Bankigu ansixiyay.
   t) in Shirkadda Caymisku si waafi ah u maamuli karto oo u xakamayn karto khataraha adeegga caymiska cusub, oo ay ku jiraan awoodda maaliyadeed ee lagu maareyn karo adeegyadii caymis ee hore iyo kuwa cusub.

3. Shirkad kasta oo buuxisa shuruudaha halkan ku xusan waa inay u soo gudbisaa Bankiga adeegga Caymiska cusub, qaab-dhismeedka shareecada, daraasadka laga sameyey ee maaliyadeed, suuqeeda,

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOMALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

shareecada iyo suurto-galnimada sharci, caddeynta Akjuweeriga in adeeggu yahay farsamo ahaan mid wanaagsan, ansixinta Guddiga Shareecada iyo Golaha Maamulka Shirkadda Caymiska, iyo macluumaadka kale ee khuseeya dib-u-eegista iyo ansixinta, waana in hawl- wadeenka caymisku/takafulku uu:

b) hayaa diiwaannada heshiisyada xiriirka ka dhexeeya ka-qeyb-galayaasha iyo hawl-wadeennada caymiska/takafulka iyo macluumaadka kale ee khuseeya qaabka hawlgalka.

t) usoo gudbiyo Bankiga nidaamka hawl-galka wakhtiga la fulinayo ama ka hor inta aan la qaadan hab cusub oo fulineed.

j) muujiyo qaabka nooca adeegga heshiiska caymiska, shahaadada heshiiska caymiska ee ka-qeyb-qaataha iyo xisaab-xirka sanadlaha ah.

4. Bankigu waa inuu ansixiyo nidaamyada iyo habraacyada adeegga caymiska.
5. Heshiisyada u dhexeeya Shirkadaha Caymiska ama laamihiisa iyo Wakiillada dullaaliinta ee ku saabsan adeeg cusub, waxay noqonayaan kuwo aan waxba ka jirin iyo kuwa xadgudub ah laguna mutaysanayo ganaax ku jira sharcigan iyo sharciyada kale ee lagu dabaqi karo, haddii aan oggolaanshiyo laga haysan Bankiga.

## Qodobka 93aad
## Mas'uuliyadda Shirkadda Caymiska ee Adeegyada Cusub

Guddiga Maamulka iyo sarkaalka sare ee hawl-wadeenka Caymiska ayaa mas'uul ka ah hubinta in si wanaagsan loo maareeyo khataraha la filayo ee adeegga Caymiska iyo in baahiyaha iyo xuquuqda ka-qeyb-galayaasha si habboon loo maamulo.

## Qodobka 94aad
## Maareynta Khatarta Adeegyada Caymiska

1. Shirkadaha Caymiska waa inay lahaadaan siyaasado iyo hab-raacyo ku habboon maareynta khataraha la xiriira adeegyada Caymiska ay bixiso iyo inay u caddeeyaan mas'uuliyadaha ka saaran ka-qeyb-galeyaasha.
2. Shirkadaha Caymiska waa inay hubiyaan in siyaasadaha iyo hab-raacyadu ay ku habboon yihiin xeyn-daabka khataraha la xiriira adeegyada Caymiska ee uu bixiyo Caymiyuhu oo loogu tala-galay inay

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

aqoonsadaan oo ay xakameeyaan khataraha adeegga Caymiska ee dhammaan isku xiran oo ay ku jiraan heerarka adeegga Caymiska ee horumarinta, oggolaanshaha, qiimaha adeega, suuq-geynta, iibinta, qeybinta, maareynta faylalka, xisaabaadka, iyo adeegga iyo daryeelka.

3. Siyaasadaha iyo hab-raacyada lagu maareynayo khataraha adeegga Caymiska ee adeegyada cusub ee Caymiska iyo dib-u-qiimeynta ama dhaqan-gelinta isbedelada iyo shuruudaha adeegyada Caymiska ee jira waa in si rasmi ah loo dhaqan-geliyo ka dib marka ay ansixiyaan Golaha Maamulka Caymiska iyo Bankiga.
4. Shirkadaha Caymiska waa inay xaqiijiyaan in maaraynta khataraha adeegga Caymiska ay si wanaagsan iskugu xiraan qaab-dhismeedka maamulka guud ee Caymiska iyo nidaamka maaraynta khatarta.
5. Dhammaan siyaasadaha iyo hab-raacyada maareynta khatarta waa inuu u gudbiyaa Shirkadda Caymiska waqtiga ugu habboon dhammaan qeybaha iyo heerarka ay khusayso ee ka tirsan Shirkadda Caymiska isla markaana markasta dib loo eego shaqada maaraynta khatarta ee Shirkadda Caymiska.

## Qodobka 95aad
## Amniga iyo Hufnaanta Nidaamyada

1. Caymiyuhu waa inuu lahaadaa nidaamtiknoolajiyadeed oo Takaaful oo wanaagsan
2. Shirkadaha Caymisku waa inay xaqiijiyaan ku-filnaanta iyo amniga nidaamyada teknoolojiyadda iyo kaabayaasha si ay u taageeraan adeegyadadooda iyagoo samaynaya qiimeyn sax ah oo joogto ah oo ku saabsan khatarta la xiriirta tignoolajiyada.
3. Shirkadaha Caymiska waa inay lahaadaan siyaasad ku aaddan bed-qabka iyo ku- filnaanta nidaamyada.

## Qodobka 96aad
## Hab-raaca Kor-joogteynta

Shirkadaha Caymiska waa in ay xaqiijiyaan in ay leeyihiin siyaasado iyo hab-raacyo ku filan la-socodka iyo xakameynta khatarta adeegyada Caymiska.

# CUTUBKA LABO IYO TOBNAAD
# HESHIISYADA CAYMISKA

## Qodobka 97aad
## Heshiisyada Caymiska

1. Heshiiska Caymiska waa in loo diyaariyaa oo loo saxiixaa laba nuqul, hal nuqul, oo ay weheliso lifaaqyadiisa iyo dokumentiyada taageeraya, waa inuu hayaa hawl- wadeenka Caymiska iyadoo laga dhigayo nuqul la geliyey diiwaan iyo mid ku jira Aladaha wax lagu keydiyo, nuqulka kale waa in lagu wareejiyo ka qeybqaataha.
2. Shirkadaha Caymiska, wakiillada caymiska iyo wakiillada dillaaliinta waxay eegi karaan mawduuca heshiiska Caymiska ka hor intaanay gelinheshiiska Caymiska.
3. Shirkadda Caymiska, wakiillada caymiska, wakiillada dillaaliinta iyo ka-qeyb- galayaashu waa inay helaan oggolaanshaha dhinaca kale si qoraal ahaan ah oo ay ku jiraan shuruudaha iyo waajibaadka u horseedaya kordhinta ama dhimista mas'uuliyadda dhinac kasta.

## Qodobka 98aad
## Qaadashada Heshiiska Caymiska

Dhammaan faa'iidooyinka adeegga caymiska/takafulka waa in la siiyaa ka- faa'iideystayaasha la aqoonsaday.

## Qodobka 99aad
## Cusbooneysiinta iyo Kordhinta Heshiiska Caymiska

1. Ka-qeyb-qaataha waa inuu codsi qoraal ah oo ku saabsan cusboonaysiinta ama kordhinta Heshiiska Caymiska u soo gudbiyaa Shirkadda Caymiska.
2. Caymiyuhu waa inuu qiimeeyaa cusboonaysiinta ama kordhinta Heshiiska Caymiska, isagoo tixgelinaya khatarta imaan karta, wuxuuna wax ka beddeli karaa qiimaha si waafaqsan heshiiska.
3. Caymiyuhu kuma xiri karo bixinta faa'iidada ama qeyb ka mid ah cusboonaysiinta Heshiiska Caymiska.

## Qodobka 100aad
## Nuxurka Heshiiska Caymiska

1. Heshiiska Caymiska waa inuu ku jiraa dhammaan shuruudaha ay ku heshiiyeen dhinacyada.
2. Dhinacyada iyo ka-faa'iideystayaasha kale looma oggola inay beddelaan

waxa ku jira Heshiiska Caymiska iyagoo aan oggolaansho hore ka haysan dhinaca kale.

3. Heshiiska Caymiska waa inuu lahaadaa waxa soo socda:
   - b) magaca buuxa iyo ciwaanka qeybaha;
   - t) magaca iyo lambarka diiwaanka Heshiiska Caymiska;
   - j) qaaraanka iyo habka lacag-bixinta;
   - x) qadarka faa'iidada ee Caymiska iyo habka Magdhawga khasaaraha;
   - kh) waxa la cayminayo iyo goobta;
   - d) khatarta la xiriiri karta Caymiska;
   - r) muddada Heshiiska Caymiska;
   - s) cinwaanka iyo nambarka Bankiga lagala soo xiriirayo haddii ay jirto cabashooyinka;
   - sh) ciwaanka iyo nambarka lagala xiriiri karo waaxda sheegashada ee hawl- wadeenka Caymiska;
   - dh) xaaladaha iyo arrimaha dib-u-la-noqoshada Heshiiska Caymiska iyo xisaabinta lacag-celinta ka-qeyb-qaataha; iyo
   - c) shuruudahaiyo arrimaha kale ee Caymiska ee ay ku heshiiyeen dhinacyadu.

4. Bankigu wuxuu dib-u-qaabeyn karaa waxa ku jira Heshiiska Caymiska ee adeeg kasta ama qeyb kasta oo gaar ah kana dhigi karaa mid ku waajib ah Shirkadaha Caymiska.

## Qodobka 101aad
## Caymiska Waajibka ah

1. Bankiga iyo Dawladdu waxay ka dhigi karaan Caymiska mid ku khasban qeyb ama caymin gaar ah marka loo eego qodobbada sharcigan.
2. Arrimaha la xiriirta noocyada Caymiska khasabka ah ee ku xusan faqradda (1) ee qodobkan waxaa lagu maamulayaa sharci keleoo caymis ah.

## Qodobka 102aad
## Qaaraanka ama tabarucaadda

1. Ka-qeyb-galeyaashu waxay mas'uul ka yihiin inay bixiyaan qaaraanka ama tabarucaada oo sal-dhig u ah habka loo go'aamiyay shuruudaha iyo waafaqsanaanta Caymiska.
2. Dhammaan Qaaraanka ama tabarucaada waa in si toos ah loogu shubaa Shirkadda Caymiska ama xisaabta Banki ee Shirkadda Caymisku

leedahay.

3. Mas'uuliyadda Shirkadda Caymiska ee ka-qeyb-galaha waxay bilaaban doontaa marka qaaraanka/tabarucaada la bixiyo haddii aan si kale ugu heshiin dhinacyadu.
4. Qaaraanka la siiyo Shirkadda Caymiska waxay ahaanaysaa mid hoos timaada shuruucda canshuuraha.
5. Haddii ay dhacdo wax-ka-badelka Shuruucda Caymiska ama khatarta la fili karo ee isbeddelka, qaaraanku waa la bedeli karaa iyadoo la raacayo heshiiska dhinaca kale.
6. Haddii dhinacyadu ku heshiin waayaan isbeddellada lagu sheegay faqradda (4) ee qodobkan, Shuruucda Caymiska waa lala noqonayaa.
7. Ku-tabaruca waa in loo qaddariyaa inay dhacday marka laga soo saaro khasnadda ka-qeyb-qaataha ee sanduuqa Magdhawga ah.

## CUTUBKA SADEX IYO TOBNAAD
## WAAJIBAADKA SHIRKADAHA CAYMISKA

### Qodobka 103aad
### Mabaadi'da Maal-gelinta

1. Shirkadda Caymisku waa in ay dhawrtaa mabaadi'da soo socota markay maal-gelinayso hantida:
    b) maal-gashigu waa inuu ahaadaa mid waafaqsan shareecada sida ay jideeyaan hab-raacyada Bankigu iyo guddiga shareecada.
    t) waa inay lahaataa waax aqoon iyo xirfad ku dhisan oo sameysa maal-gashiga
    j) waa in hantida si taxadir leh oo xirfadaysan loo maal-geliyaa ayadoo loo eegayo danta ka-qeyb-galayaasha iyo saamileyda taasoo ku dabooli karta nooca deymahooda.
    x) Shaqada maamulidda hantida Shirkadda iyo maamulka Caymiska waa inay xaqiijiyaan danta ka-qeyb-galayaasha iyo saamileyda haddii ay jiraan khilaaf danaysi ah.
    kh) waa inay maal-gashataa hantida ay si sahlan ku maareyn karto, oo ay si cad u xakamayn karto khatartooda oo ay awood u yeelan karto bixinta baahideeda lacageed.
    c) waa in inaysan maalgelin wax xaaraan ah oo aan sharci ahayn.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 104aad
## Shaacin Guud

1. Shirkadaha Caymisku waa inay daabacaan faahfaahinta qaabkeeda hawl-gal, mabaadi'da shareecada ee salka ku haysa iyo shahaadada shareecada oo ay saxiixeen guddiga shareecada.
2. Shirkadaha Caymisku waa inay ku daabacaan mareegaha iyo qoraallada, faahfaahinta Guddigooda Shareecada oo ay helaan ka-qeyb-galayaashu.
3. Xogta la daabacay waa inay noqotaa mid sax ah, waafi ah, oo cusub, waana inay ahaataa luuqad cad oo la fahmi karo, oo ay ku jirto keliya erayo farsamo oo kooban.
4. Shirkadaha Caymiska waa inay xaqiijiyaan waafaqsanaanta macluumaadka lagu sheegay dukumentiyada kala duwan iyo waafaqsanaanta macluumaadka la siiyo ka-qeyb-galayaasha oo la mid ah macluumaadka loo gudbiyo Bankiga.
5. Shirkadaha Caymiska waa inay, 7 (toddobo) maalmood gudahood, ku war- geliyaan ka-qeyb-galayaasha oo ay helaan oggolaanshaha wax-ka-beddelka ama isbeddelka qaab-hawleedkeeda ama shuruudaha adeeg iyo saameynta isbeddelladaas.
6. Marka saameynta isbedeladdu ay tahay mid maaddi ah oo dhaqaale ahaan sare, sii- deyntaas waa in si ku filan loo tifaftiro si ka-qeyb-galayaashu u fahmaan.
7. Bankigu wuxuu qeexi karaa shuruudo warbixineed oo gaar ah Shirkadaha Caymiska ee khuseeya siidaynta iyo faahfaahintalala wadaagayo dadweynaha.

## Qodobka 105aad
## Hawlo Reebban

1. Sirkadaha Caymiska waxaa looga baahan yahay inay iska ilaaliyaan inay sameeyaan waxyaabaha soo socda:
   - b) isticmaalka habab ganacsi oo been abuur ah iyo kuwo sharci darro ah;
   - t) sameynta lacag-dhaqis iyo maal-gelin argagixiso iyadoo la isticmaalayo ilaha dhaqaale ee ka soo baxa adeegyada Caymiska.
   - j) soo-saarista ganacsi Caymis oo been abuur ah.
   - x) bixin macluumaad been ah iyo ka-warbixinta xaaladaha maaliyadeed ee ku wajahan Bankiga, ka-qeyb-galeyaasha iyo dadweynaha.
   - kh) gelidda heshiis ama wax-qabad caqabad ku abuuri kara

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

habsamida Caymiska ama isku keli-yeelidda adeegyada Caymiska.

## Qodobka 106aad
## Diidmo Khatar

Shirkadda Caymiska waa in inaysan diidin sheegashooyinka la xiriira khatarta ama khatarta lama filaanka ah ee sababta koowaad ee khasaaraha iyadoo aan lagu sameyn baaritaan sax ah.

## Qodobka 107aad
## Joojin Adeegyo Caymis

1. Shirkadaha Caymiska, wakiillada caymiska iyo wakiillada dillaaliinta ma joojin karaan shaqadooda iyagoo aan oggolaansho qoraal ah ka helin Bankiga.
2. Shirkadda Caymiska, wakiilka caymiska iyo wakiilka dillaaliintu waa in aanay diidin inay siiyaan adeegyada Caymiska qof kasta.

## Qodobka 108aad
## Ku-filanaansho Hanti Shirkad

1. Shirkadda Caymiska waa inay haysaa hanti ku filan oo uu ku fuliyo hawlaha ganacsi si uu u daboolo kharashaadka iyo waajibaadka loo baahan yahay ee ku xusan sharcigan.
2. Bankigu waa inuu ilaaliyaa oo ku dhaqmaa shuruudaha raasamaalka iyo hababka xisaabaadka ee Shirkadaha Caymiska iyadoo la raacayo heerarka caalamiga ah ee laga hir-geliyo dalka.
3. Shirkadaha Caymiska waa inay kordhiyaan raasamaalkooda oo ka sarreeya heerka khatarta kulmi karo ee ganacsiga caymiska la xiriirta, sida ku cad awaamiirta Bankiga.
4. Bankigu waa inuu ku qiimeeyaa hantida iyo amaahyada Shirkadda Caymiska iyadoo la raacayo qodobbo ka mid ah sharcigan oo ku xiran jadwalka kormeerka Bankiga.
5. Arrimaha khuseeya qiimeynta hantida iyo amaahyada Shirkadaha Caymiska waa in lagu nidaamiyaa habraac gaar ah.
6. Bankigu wuxuu qiimeyn karaa hantida iyo amaahyada Shirkadaha Caymiska ama wuxuu u dhiibi karaa adeegayaal maddax-bannaan isla markaana kharashaadka lagu dalacayo Shirkadaha Caymiska.

## Qodobka 109aad
## Dib-u-caymis

1. Shirkadda Caymiska waxaa looga baahan yahay inuu dib-u-caymiska ka helo Shirkadaha dib-u-caymiska ee Soomaaliya ama dibadda sida ku cad oggolaanshaha Bankiga.
2. Shirkadda Caymisku waa inay u soo gudbisaa Bankiga shahaadada jiritaanka iyo xasilloonida maaliyadeed ee Shirkadda Dib-u-caymiska, oo ay hay'addeeda kormeer usoo gudbisay Bankiga.
3. Haddii dib-u-caymiska aysan ahayn mid joogta Dalka, Shirkadda Caymiska, oo haysata oggolaanshaha Guddigeeda Shareecada, waa inay usoo gudbisaa Bankiga sabab macquul oo qoraal ah si uu u helo ogolaansho gaar ah, wuxuu Bankiga oo oggolaansho ka haysta Guddiga Sare ee Shareecada bixin karaa oggolaansho gaar ah oo dib-u-ceymis ah.

## Qodobka 110aad
## Keydin Diiwaan-gelin

1. Shirkadaha Caymiska waa inay diiwaanka ku hayaan dokumentiyada Caymiska ugu yaraan shan sano.
2. Shirkadaha Caymiska waxaa looga baahan yahay inay xafidaan nuqullo ku keydsan alaadaha wax lagu keydiyo iyo dhammaystirnaanta dokumentiyada hantida, macaamilka.
3. Bankigu si uu u hubiyo, wuxuu baari karaa oo qiimeyn karaa dokumentiyada Caymiska ee ay hayaan Shirkadaha Caymiska iyo Hawl-wadeenada caymis.

## Qodobka 111aad
## Khidmad Kormeer

Shirkadaha Caymiska waxay qaadayaan kharashka hanti-dhawraha dibadda ama khabiirka Bankigu u diray si uu u baaro arimaha la xiriira dhaqaalaha ama dukumintiga kale ee Shirkadaha Caymiska.

## Qodobka 112aad
## Celinta Shahaadada Heshiiska

1. Shirkadda Caymiska waa inay ku qeexdaa heshiiska Caymiska sababaha iyo asaaska dib-u-celinta heshiiska Caymiska iyo xisaab soo celinta ka-

qeyb-qaataha, kaasoo noqonaya mid ay fasaxeen guddiga shareecada.

2. Caymiyuhu waa inuu tixgaliyaa arrimaha soo socda marka la go'aaminayo qiimaha dhiibitaanka shahaadada:
   b) meesha ay khusayso, si waafaqsan mabaadi'da dhabta ah ee la aqbalay;
   t) si loo hubiyo in si cadaalad ah loola dhaqmo ka-qeyb-galayaasha; iyo
   j) in la raaco heerarka hab-dhaqanka suuqa.

3. Shirkadda Caymiska waa in ay xaqiijisaa in qaddarka la siinayo ka-qeyb-qaataha marka ay dib-u-celinayso shahaadada in laga saaro Sanduuqa Magdhawga Caymiska iyo Sanduuqa Maal-gelinta Caymiska ilaa inta ay khusayso.
4. Shirkadda Caymiska keliya ayaa dalbanaysa kharashka hawlaha dhiibista iyo xisaabinta oo lagu qeexay Heshiiska Caymiska kharashka habaynta iyo ka- shaqeynta codsiga dhiibista.

## CUTUBKA AFAR IYO TOBNAAD
## NUQSAANTA LACAGTA IYO HABEYNTA KHASAARAHA

### Qodobka 113aad
### Sheega-shooyin

1. Xuquuqlaha waa inuu u soo gudbiyaa Shirkadda Caymiska sheegashadiisa cayminta.
2. Shirkadaha Caymiska waa inay bixiyaan cayminta Xuquuqlaha iyadoo loo eegayo shuruudaha Heshiiska Caymiska iyo khasaaraha dhacay 30 (soddon) maalmood gudahood, laga bilaabo taariikhda sheegashada.
3. Caymiyuhu waa inuu ka bixiyaa khasaaraha Xuquuqlaha sanduuqa ay khuseeyso si ku salaysan go'aanka heshiiska iyo hab-raaca Sanduuqa Magdhawga Caymiska iyo Heshiiska Caymiska.
4. Caymiyuhu waa inuusan diidin sheegashada marka laga reebo ku salaysnaan caddayn dhab ah oo macquul ah waana inuu Xuquuqlaha u ogeysiiyaa qoraal ahaan sababaha diidmada sheegashada.
5. Caymiyuhu waa inuu ku war-geliyaa Bankiga cabashada Xuquuq-laha la diiday 7 (toddobo) maalmood oo shaqo gudahood.
6. Xuquuqlaha wuxuu xaq u leeyahay inuu u gudbiyo Bankiga cabasho ka dhan ah diidmada sheegashada wuxuuna xaq u leeyahay inuu ka gudbiyo dacwad.
7. Bankigu waa inuu u jawaabaa Xuquuqlaha 15 (shan iyo toban) maalmood oo shaqo gudahood marka uu helo cabashada.

## Qodobka 114aad
## Sheegasho iyo Dokumentiyo Been ah

1. Ka-qeyb-galeyaashu waa in aysan si-ula-kac ah u bixin macluumaad been ah ama warbixinno si ay lacag ama dheefo u helaan sheega-shooyin been abuur ah oo ay diyaariyaan dokumenti been ah ooay ku doonayaan magdhaw.
2. Shirkadaha Caymiska waxaa looga baahan yahay inay dejiyaan habab wax-ku-ool ah si loo go'aamiyo loogana hortago wax-is-daba-marinnada, Bankiga wuxuu kormeerayaa hir-gelinta habkan.

## Qodobka 115aad
## Arimaha Waajibaadka ah ee hoos u dhaca Sanduuqa Magdhawga Caymiska

1. Shirkadaha Caymiska waa inay dib-u-habayn Qard-xasan ku sameeyaan marka hantida Sanduuqa Magdhawga Caymiska aysan ku filnayn inay buuxiso deymaha.
2. Shirkadaha Caymiska waa inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka uu Bankigu farayo.

# CUTUBKA SHAN IYO TOBNAAD
# HANTI-DHAWRKA IYO SAXIIXAHA AKJUWEERIGA

## Qodobka 116aad
## Warbixin Hanti-dhawr

1. Hawl-wadeennada caymiska/takaafulka iyo shirkadaha haysta hawl-wadeennada takaaful waa inay diyaariyaan warbixin xisaabeedka sannadlaha ah ee hawlahooda si waafaqsan Heerarka Warbixinta Maaliyadeed ee Caalamiga ah (IFRS) iyo si waafaqsan Xisaabinta iyo Heerarka Ururka Hanti-dhawrka ee Machadyada Maaliyadeed ee Islaamka (AAOIFI) sida uu bankigu u qeexayo.

2. Marka lagu daro faqradda (1) ee shuruudaha qodobkan, Shirkadda Caymiska waa inay ku dartaa warbixinta xisaabinta hawlaha gaarka ah ee Caymiska sida ku cad sharcigan.

## Qodobka 117aad
## Doorka Saxiixaha Akjuweeriga

1. Hawlaha Akjuweeriga ee Shirkadda Caymiska waa inay ahaadaan sida soo socota:
   - b) inuu helo dhammaan macluumaadka loo baahan yahay iyo macluumaadka saxiixaa kjuweeriyadii hore.
   - t) hubinta heerka dhaqaale ee Shirkadda Caymiska.
   - j) qiimeynta awoodda Shirkadda Caymiska si uu u guto waajibaadkiisa mustaqbalka.
   - x) qiimeynta xaaladda ee Sanduuqa Magdhawga ee Caymiska iyo hanaanka Qard- xasan;
   - kh) inuu talo ka bixiyo qiimaha badeecadaha shirkadda caymiska/takaafulka oo uu caddeeyo in qiimuhu ku filan yahay, bankiguna wuxuu ka soo saarayaa xeer- nidaamiye ku saabsan waxa ay ka koobnaanayso warbixinta xaaladda maaliyadeed;
   - d) bixinta iyo oggolaanshaha talooyin la xiriira maalgashiga.
   - r) inuu bixiyo talo iyo tusaale la xiriira hawl-wadeenada caymiska/takafulka
   - s) siyaasadda maalgashiga.
   - sh) inuu go'aamiyo oo u soo jeediyo guddiga shareecada takaful ee haraaga sanduuqa Magdhawga ah oo diyaar u ah in loo qeybiyo ka-qeyb-galayaasha.
   - dh) iyo talooyin kale oo wax-ku-ool ah

2. Saxiixaha Akjuweeriga wuxuu masuul ka noqonayaa si xirfadaysan taladiisa iyo farsamo ahaanba adeegyada uu siiyo Shirkadda Caymiska, oo marka uu helo codsiga Shirkadda Caymiska, uu siiyo maamulka Shirkadda Caymiska macluumaadka iyo dukumentiyada soo socda:
   - b) xog akjuweeri ah iyo warbixinno ku saabsan heerka maaliyadeed ee shirkadda caymiska/takafulka;
   - t) warbixin 60 (lixdan) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda uu dhacayo sanad-xisaabeedka shirkadda caymiska/takaafulka, taasoo ka tarjumaysa ku-filnaanta qodobbada farsamo ee hawl-wadeennada caymiska/takaafulka;
   - j) warbixin 60 (lixdan) maalmood gudahooda laga billaabo taariikhda

uu dhacayo adeegga;

x) sanad-maaliyadeedka oo ka tarjumaysa ku-filnaanta qiimaha adeegga caymiska/takafulka;

kh) gaar ahaan ku-filnaanta tabarucaadka sanduuqa magdhawga ka-qeyb- galayaasha;

d) falanqeynta helidda faa'idada maal-gashiga;

r) falanqeynta horumarinta faylalka ee hawl-wadeenka Takaful;

s) qiimaynta qiimaha;

sh) warbixin ka-tarjumeysa ku-filnaanta ama haddii kale la mid ah hantida deymaha; iyo

dh) horumarinta siyaasadda hoos ku qoran.

3. Caymiyuhu waa inuu hubiyo u-hoggaansanaanta dhammaan waajibaadka iyo warbixinnada akjuweeriga ee loo baahan yahay, haddii kale, Bankigu waa inuu magacaabaa Shirkad fulisa hawlaha akjuweeriga isla markaana shirkadda Caymisku bixiso kharashka si uu u guto waajibaadyadiisa.
4. Hawl-qabadka akjuweeriga ee Shirkadda Caymiska waa in, iyadoo ay jiraan khataro dhici kara si degdeg ah ama dhici kara mustaqbalka soo food leh Shirkadda Caymiska, waa in uu u soo gudbiyaa warbixin ku salaysan arintaas, balse aan ka dambayn 7 (toddobo) maalmood, isla markaana si toos ah ugu gudbiyo maamulka Shirkadda Caymiska, maamulkuna waa inay baaraan warbixinta, soona jeediyaan in si deg deg loo xaliyo, loona gudbiyaa Bankiga dhammaan macluumaadka la xiriira 15 (shan iyo toban) maalmood gudahooda marka la helo warbixinta.
5. Hawl-qabadka akjuweeriga ee Shirkadda Caymiska waa inay bixisaa warbixinta xaaladda maaliyadeed ugu yaraan sannad kasta ama si gaar ah mar kasta oo uu Bankiga u baahdo.
6. Warbixinta xaaladda maaliyadeed ee lagu sheegay faqradda (5) ee qodobkan waa inay si dhab ah u qiimeysaa xaaladda maaliyadeed ee guud ee Shirkadda Caymiska, iyadoo la raacayo hab-raaca Caymiska ee uu soo saaro Bankiga.
7. Shirkadda Caymisku waa inay lahaataa siyaasad loo dhan yahay oo lagu maareeyo khatarta ganacsiga si loo maareeyo khatarteeda iyo khataraha maal- gelinta Caymiska iyo in la caddeeyo doorka Akjuweeriga shirkadda, shaqada maareynta khatarta, Sarkaalka u-hoggaansanaanta Shareecada iyo kuwa kale ee arrintan la xiriira.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## CUTUBKA LIX IYO TOBNAAD
## SHURUUDAHA FULINTA EE GANACSIGA CAYMISKA/TAKAFULKA

### Qodobka 118aad
### Xaddidaad Ra'sumaal

1. Bankiga waa inuu soo saaraa xeer-nidaamiye qeexaya xaddiga ugu yar ee uu noqonayo Ra'sumaalka Shirkadaha Caymiska ee ka ganacsada noocyada kala duwan ee caymiska.
2. Shirkadda Caymisku waa inay wada haysaa dhammaan saamiyada inta aanan la diiwaan-gelinta.

### Qodobka 119aad
### Xaddidaad Isku-filnaasho Maaliyadeed

1. Bankiga waa inuu xeer-nidaamiye ku dajiyaa xaddiga isku-filnaashaha maaliyadda, Bankiga ayaana jaangoynaya habka kala duwan ee loogu dajinayo noocyada kala duwan ee caymiska.
2. Shirkada Caymisku waa inay hubisaa in aysan ka hoos marin xaddiga isku- filnaashaha maaliyadda ee uu xeer-nidaamiyuhu qeexay.

### Qodobka 120aad
### Tilmaamo Maal-gelin

1. Bankiga oo raacayo xeer-nidaamiye waa inuu,
   - b) sameeyo hab-raacyo kala duwan oo loogu talo-galay maalgashiga nooc kasta oo ka mid ah adeegga caymiska/takafulka iyo qeybta hawlaha caymiska/ takafulka;
   - t) qeexo dariiqooyinka maal-gashiga ee waafaqsan shareecada Islaamka iyo kuwa aan waafaqsanayn.
   - j) caddeeyo doorka guddiga shareecada ee ansixinta siyaasadaha maal-gashiga.
   - x) dejiyo ugu yaraan iyo ugu badnaan soo-bandhigidda maalgashiga qeyb kasta oo ka mid ah adeegyada maal-gashiga ee wadarta hantida shirkadda caymiska/takafulka;
   - kh) hubiyo in shirkadda caymiska/takaafulka uu haysto maamul iyo dhaqaale ku filan oo uu ku maareeyo maal-gashigiisa; iyo
   - c) bixiyo tilmaamo kasta oo kale oo la xiriira hawlaha maal-gashiga.

## Qodobka 121aad
## Siyaasado la Xiriira Sanduuq Takaful

1. Caymiyuhu waa inuu, sanduuq kasta, u dejiyaa Siyaasado Sanduuq oo qeexaya:
   b) khataraha in la daboolo, gaar ahaan iyadoo la tixraacayo nooca cayminta;
   t) dhacdooyinka lacagta laga bixinayo sanduuqa ka-qeybqaataha iyo habka lagu go'aaminayo qadarka la bixinayo;
   j) kharashyada lagu dallaci karo sanduuqa;
   x) habka iyo sida lagu go'aamiyo faa'iidada ama nusqaanta sanduuqa;
   kh) habka loo bixinayo hantida dheeriga ah ee sanduuqa; iyo
   d) habka loo xalinayo wax kasta oo dhiman.

## Qodobka 122aad
## Qodobbada Xalinta

1. Caymiyuhu waa inuu hubiyaa:
   b) in la xaqiijiyo isku-filnaansho lagu sameeyay Sanduuqa Khatarta Caymiska si loo hubiyo in sheegashada ka-qeyb-galayaasha la fulin karo.
   t) in shirkaddu haysato dhaqaale ku filan oo ay kudabooli karto kharashaadkeeda iyo waajibaadkeeda oo ay ka mid tahay in ay Qard-xasan siiso Sanduuqa Khatarta Caymiska haddii ay ku timaado nusqaan Sanduuqa Khatarta Caymiska.

2. Shirkadda Caymiska waa inay caddeysaa raasu-maalkeeda ay uheli karto Qard- xasan Sanduuqa Khatarta Caymiska marka lagu daro xalkaas Shuruudaha ku talo- galka Raasa-maal.

## Qodobka 123aad
## Qiyaasta Xalinta

Bankigu waa inuu dejiyaa cabbirrada iyo beegsiga bartilmaameedka xalinta shuruudaha is-bixinta Shirkadda Caymiska

# CUTUBKA TODOBO IYO TOBNAAD
# DHAQAN-GELINTA, TALLAABOOYINKA SIXIDDA IYO TALLAABADA SOO-AFJARIDDA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 124aad
## Magacaabis Khabiir

1. Markay u muuqato Bankiga inay jiraan sababo lagu fulinayo ama lagu sixi karo takaaful, waxay ogeysiis qoraal ah kaga dalban kartaa shirkadda caymiska/takaafulka inay u magacawdo khabiir si uu ugala taliyo shirkadda hawlaheeda oo dhan iyo diyaarinta warbixinta Bankiga.
2. Caymiyuhu wuxuu u fududaynayaa khabiirka la magacaabayo kharash kasta oo uu ku hawl-gelayo.

## Qodobka 125aad
## Baarayaal Madax-bannaan

1. Bankigu wuxuu u magacaabi karaa hal qof ama in ka badan oo karti u leh baaritaannada madaxa-bannaan si ay u baaraan Shirkadda Caymiska iyagoo metelaya Bankiga, si ay uga talo-bixiyaan dhamman xaaladaha Shirkadda Caymiska.
2. Baaritaan sameeyaha madaxa-bannaan waa inuu u soo gudbiyaa warbixin la xiriirta weydiimaha uu ka qabo hawl-wadeenka shirkadda caymiska.
3. Kharash kasta iyo kharashaadka kasta oo la xiriira baaritaanka madaxbannaan waxa bixinaya hawl-wadeenka shirkadda caymiska.

## Qodobka 126aad
## Maamul iyo Awoodo Faro-gelin

1. Bankigu wuxuu u magacaabi karaa qof maamula hawlaha shirkadda caymiska haddii ay dhacdo sababo macquul ah oo ay maamulayaasha shirkaddu muujiyaan heer aan ku filnayn waxqabadkooda.
2. Bankigu wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiye si uu u qeexo sababaha macquulka ah ee faqradda (1) ee qodobkan.
3. Maamulaha uu Bankiga u magacaabayo si waafaqsan qodobkan, wuxuu awood u leeyahay, kuna maamuli karaa shaqada iyo arrimaha qofka loo magacaabay.
4. Maamuluhu wuxuu mas'uul ka yahay qaadista tallaabadaas iyo sameynta wax kasta oo lagama maarmaanka u ah ilaalinta iyo dhawridda adeegyada ama hantida shirkadda loo magacaabay iyo danaha ka-qeyb-galayaasha, macaamiisha, deyn- bixiyeyaasha ama dadweynaha.
5. Maamuluhu waa inuu Bankiga u soo gudbiyaa warbixinaha ee u baahan

yahay, wixii kharash ee la xiriira maamulka waxa bixinaya shirkadda caymiska.

## Qodobka 127aad
## Hab-dhaqanka Ganacsiga Shati Kala-noqoshada kadib

1. Marka lagala noqdo rukhsadda hawl-wadeennada takaaful, sida uu dhigayo sharciga, shirkadda caymiska marka ay hesho ogaysiiska Shati-kala- noqoshada kadib, ma sameyn karto;
   b) gelidda qandaraas cusub oo caymis ah;
   t) dib-u-cusboonaysiin ama beddelaad qandaraas takaful ah oo la galay ka hor taariikhda la bilaabay;
   j) inuu codsado ama kala xaajoodo ganacsiga caymiska oo ay ku jirto dib-u- cusboonaysiinta iyo sii-wadidda ganacsigaas shirkad shisheeye oo caymis ah; ama
   x) dhex-dhexaadinta macaamiil gudaha Soomaaliya iyo shirkad ajnebi ah oo caymis ah si uu u soo fuliyo adeegyada caymiska.

2. Caymiyuhu waa inuu ku dhaqaaqaa hadba sida ay lagama maarmaan u tahay ama uu Bankigu uga baahan yahay si uu u hubiyo in loo sameeyey ama loo samayn doono wax maangal ah oo lagu leeyahay iyo in la sameeyo qabanqaabo ku filan ama ay jiri doonto bixinta qaaraan iyo kharash macquul ah.

## Qodobka 128aad
## Gaba-gabeyn iyo Soo-afmeerid

1. Caymiyuhu ma go'aamin karo inuu si iskiis ah shaqada uga baxo isagoo aan ka haysan oggolaansho Bankiga.
2. Caymiyuhu kama dalban karo Bankiga ka-bixidda shaqada isagoon la kulmin Bankiga.
3. Markuu bankigu oggolaado qaadashada go'aanka musalafnimada ikhtiyaarka ah, qaraarka waa in lagu daabacaa faafinta rasmiga ah.
4. Haddii shirkadda caymisku kacdo musalafnimo awgeed, iyadoon loo eegayn hannaanka isbixin la'aanta iyo ilaalinta xuquuqda deyn-bixiyayaasha, hantida shirkadda ee la caddeynayo ama lagu iibiyo naado (auction) waa in marka hore la gutaa waajibaadka shirkadda ka saaran ka-qeyb-galayaasha caymiska.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

5. Bankigu wuxuu billaabi karaa ama ku lug yeelan karaa caddeynta ama naado- gelinta shirkada caymiska ama laanta caymiska shisheeye ee ka howl-gasha Soomaaliya.

## Qodobka 129aad
## Iibin-naado Khasab ah

1. Bankigu wuxuu ku amri karaa shirkadda caymiska in ay si khasab ah loogu iibiyo naado, mid ka mid ah sababahan soo socda awgood.
   b) in caymiyuhu ku xad-gudbo sharcigan ama xeer-nidaamiyaha si daran;
   t) in shirkadda caymisku aysan awoodin ama ay u badan tahay in ay awoodi waydo in ay bixiso deymaha;
   j) in shirkadda caymisku ku guul-darraysato ama ay u badan tahay inay ku guul-darraysan doonto buuxinta shuruudaha raasa-maal ee sharcigan;
   x) in baaraha madaxa-bannaan uu caddeeyo in naado-gelintu ay lagama maarmaan u tahay danta guud;
   kh) in shirkadda caymisku aysan is-bixin karin sidoo kalana laga rajo qabin in ay soo kabato;
   d) in shirkadda caymiska, milkiyadeeda shirkadda leh ay gasho xaalad musalafnimo;
   r) in shirkadda caymiska shatiga lagala noqdo; ama
   s) in shirkadda caymisku fududeeysay lacag-dhaqid ama maal-gelin argagixiso.

2. Bankigu waa inuu soo saaraa xeer-nidaamiye lagu maamulayo habka naadada khasabka ah, waxaana uu bixinayaa dhammaan arrimaha khuseeya hab-socodka howlahaas.
3. Haddii rabitaanka naadada uu la yimaado qof kale sida qof deyn ku leh shirkada caymiska, Bankigu waxa uu eegayaa codsiga, isla markaana kala doodayaa arrimahaas qofka raadinaya naadada.
4. Bankigu waa inuu 2 (labo) maalmood gudahooda oo ka bilaabanta maalinta uu Shirkadda Caymiska ee sida khasabka loogu iibinayo naadada, ku soo daabaco faafinta rasmiga ah iyo ugu yaraan 2 (labo) wargeys oo maxali ah iyo mareegaha Internetka, ogeysiis ku saabsan meeleynta shirkadda musalaftay ee sida khasabka ah loo iibinayo naadada iyo balan-qabashada fulinteeda.

## Qodobka 130aad
## Qofka Naadada Mas'uulka ka ah

1. Qofka naadada mas'uulka ka ah waa in uu awood u leeyahay inuu-
   - b) inuu billaabo nidaam sharci ah isagoo ka wakiil ah shirkadda caymiska ah oo dacwad naado wajaheysa ama ka difaaco dacwad kasta oo sharci ah;
   - t) inuu maamulo arrimaha Shirkadda caymiska;
   - j) helitaanka adeegyada akjuweeriyada, qareennada, nootaayayaasha, xisaabiyeyaasha, qiimeeyayaasha iyo la-taliyayaasha kale ee xirfadlayaasha ah;
   - x) inay sameeyaan dhexdhexaadin ama habayn u dhexaysa shirkadda caymiska iyo dadka sheeganaya inay yihiin kuwa daynta leh ama shakhsiyaad sheeganaya inay leeyihiin sheegashooyin hadda taagan ama mustaqbalka;
   - kh) ururiyo oo soo ceshado dhammaan hantida iyo sheegashooyinka kale ee Shirkadda Caymiska;
   - d) ku iibiyo naado dadweyne hantida ma-guurtada ee Shirkadda Caymiska ama nidaam wada oggol ah oo ku saabsan, qeyb ama dhowr qeybood;
   - r) iibiyo dhammaan ama qeyb ka mid ah hantida maaliyadeed ee shirkadda si ay ugu celiso dadka deynta leh;
   - s) caddeynta waxba kama jiraanka iyo diidmada fal kasta oo ay ku kacday Shirkadda Caymisku muddo sannad gudaheed ah laga billaabo taariikhda uu Bankiga kasoo baxay go'aanka uu ku magacaabay hawl-wadeenka naadada mas'uulka ka ah, oo ayna ogaadaan in falalkaasi ay halis ku yihiin danaha Shirkadda Caymiska, ka-qeyb-galayaasheeda ama dadka deynta leh, sida ay xaaladdu tahay;
   - sh) saxiixo dhammaan falalka uu fulinayo isagoo ka wakiil ah Shirkadda Caymiska
   - dh) ka-wakiil ahaado shirkadda caymiska ee wajeheysa naadada dhan kasta oo lagu fulinayo inay ku lugleeyihiin shirkad kale ama shirkad kale oo Shirkadda Caymiska la laheyd xiriir;
   - c) soo-saarista, warqad ganacsi ama wax la mid ah oo ku dhex jira xaydaabka hawlaha naadada;
   - g) abaabulidda dhaqaalaha lagama maarmaanka ah iyadoo la adeegsanayo dammaanad-qaadka Shirkadda Caymiska ee la xaraashayo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

f) uu magacaabo qof kasta oo isaga wakiil ka ah;
q) caddeeyo mas'uuliyadda shaqsiga ah ee ka saaran saamile kasta, xubin ka mid ah guddiga maamulka iyo maareeyayaasha shirkadda caymiska ee wajaheysa naadada;
k) meesha ka saaro dheefaha la siiyo saamilayda;
l) heshiiska ama gorgortanka iyo ka-go'aan-gaaridda fal kasta oo ay dani ugu jirto ka-qeyb-galayaasha adeegyada shirkadda caymiska ee wajaheysa naadada;
m) u dirista codsi qoraal ah qof kasta oo ah ama ahaa sarkaal, maareeye, shaqaale ama hanti-dhawraha dibadda ee Shirkadda Caymiska ama qof kasta oo kale oo xafidaya lacagaha ama hantida kale ee caymiska ee uu ku socto naadadu si ay u:
    i. Caawiyaan qofka mas'uulka ka ah naadada inta lagu jiro nidaamka naadada;
    ii. la shaqeeyaan qofka mas'uulka ka ah naadada si ay ugu fududaato wax kasta oo khuseeya naadada;
    iii. usoo saara dokumenti kasta oo la xiriira hawlaha Shirkadda Caymiska.

2. Qofka mas'uulka ka ah naadada wuxuu samayn karaa baaris si loo ogaado sababaha keenay khasaare iyo inuu ka warbixiyo dadka ku lug leh khasaaraha, ku xad- gudubka xeerarka ama xeer-nidaamiyayaasha iyo siyaasadaha shirkadda caymiska ee naadadu ku soctoo.

## Qodobka 131aad
## Qorshaha Dammaanadda Ka-qeyb-galayaasha

1. Waa inuu abuuraa oo uu ilaaliyaa Bankigu si waafaqsan qodobkan, ka-qeyb- galayaashu waxa ay dammaanad-qaadayaan dhaqaale ku saabsan Caymiska guud iyo caymiska qoyska ee ay fulinayaan hawl-wadeennada takaaful ee Soomaaliya kaasoo waafaqsan siyaasadaha Takaaful ee Soomaaliya in magdhaw la siiyo dadka ku andacoonaya in ay qaan ku leeyihiin shirkadda musaliftay.
2. Waa in loo soo shubaa ka-qeyb-galeyaasha dhaqaalaha ilaalinta Bankiga dhammaan canshuuraha lagu soo rogo lagana qaado hawl-wadeennada takaaful si Bankiga u cayimo.
3. Bankigu waa inuu soo saaraa xeer-hoosaadyo qeexaya habka dammaanad-qaadka ka-qeyb-galayaashu u hawl-gelinayaan una maamulayaan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 132aad
## Kidmadda Maamulka

1. Bankiga Dhexe waxay soo rogaysaa khidmad ka-qaadis hawl-wadeenada takaaful si loo fududeeyo xeer-nidaamiyayaasha iyo kormeerka lagu xusay sharcigan.
2. Bankiga Dhexe waxay dejineysaa xeer-nidaamiyaha qaabka khidmaddan loo soo rogayo.

# CUTUBKA SIDEED IYO TOBNAAD
# GANAAXYADA

## Qodobka 133aad
## Caymis aan Shati Haysan

1. Ganaaxyada soo socda ayaa lagu soo rogayaa hawl-wadeennada caymiska ee bixiya ganacsiga caymiska iyadoo aan laga helin Bankiga shatiga loo baahan yahay ama ku lugyeesha hawlo ka-hor-imaanaya shuruudaha shatiga uu Bankigu bixiyo sida ku cad xeerkan.
   b) Shirkadda caymiska:USD 50,000 (konton kun) Doolarka Mareykanka ama lacag shillin soomaali u dhiganta;
   t) Hawl-wadeennada caymiska:USD 10,000 (toban kun) Doolarka Mareykanka ama lacag shillin Soomaali u dhiganta.

2. Haddii qofku ku celiyo hawlo aan shati lahayn mar labaad, ganaaxyada ku xusan qodobkan waxaa lagu dalacayaa laban-laab qiimaha kor ku xusan.

## Qodobka 134aad
## Dib-ugu-dhicida Cusboonaysiinta Shatiga

Haddii Shirkadda Caymiska ama hawl-wadeennada caymiska uu ku kaco dib-u-dhac cusboonaysiinta shatiga, waxay mutaysanaysaa ganaax USD 1000 ama lacag shilin Soomaali u dhiganta maalin kasta oo dib-u-dhac ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 135aad
## Ku-xad-gudub Shuruudo Shati

Marka la caddeeyo, inta lagu guda jiro habka qiimeynta, in codsiga shatiga lagu sheegay macluumaad been abuur ah oo aan run ahayn oo ka hor imaanaya sharcigan, codsaduhu wuxuu gelayaa dembi wuxuuna mutaysan doonaa, marka ay caddayso maxkamadda awoodda u leh, ganaax dhan lacag shillin soomaali u dhigantaUSD 20,000 doolarka mareykanka ama xarig 6 (lix) bilood ah, ama ganaax iyo xadhig wada socda.

## Qodobka 136aad
## Dembiga la Xiriira Hantida Ugu Yar iyo Xadka Isku Filnaanta

Shirkadda caymiska ee u-hoggaansami wayda raasa-maalka ugu yar iyo shuruudaha xalinta maaliyadeed,waxay galaysaa fal-dambiyeed, waxayna mutaysanaysaa ganaax aan ka badnayn lacag shillin Soomaali u dhiganta USD 30,000 (soddon kun) Doolarka Mareykan.

## Qodobka 137aad
## Bixinta Adeeg Caymis oo aan Fasax Laga Haysan Bankiga

Shirkad Cay mis ama Wakiil caymis ama Wakiil dillaal oo bixiya adeeg caymis oo uusan fasax uga haysan Bankiga wuxuu mutaysanayaa ganaax aan ka badnaynUSD 5,000 (shan kun) Doolarka Mareykan ama lacag shillin Soomaali oo u dhiganta.

## Qodobka 138aad
## U Hogaansan La'aanta Shareecada

1. Haddii ay dhacdo in Shirkadda Caymiska aysi bareer ah ugu xad-gudubto mabaadi'da Shareecada ama ay qaaddo tallaabooyin aan sax aheyn ee ah ku- dhaqan la'aanta Shareecada, waxay mutaysanaysaa ganaax dhan USD 20,000 (labaatan kun) Doolarka Mareykan ama lacag shillin Soomaali u dhiganta.
2. Haddii xad-gudubku sii socdo, Bankigu wuxuu xaq u leeyahay inuu ka joojiyo shatiga.

## Qodobka 139aad
## Ka-qeyb-gal Caymis Shisheeye

Haddii ay shirkaddu jebiso qodobka 42aad ee sharcigan, waxay mutaysanaysaa ganaax aan ka badneyd kharash-qabashada heshiiska Caymiska.

## Qodobka 140aad
## Dib-u-dhigis Macluumaad

1. Haddii Shirkadda Caymisku ama hawl-wadeenka Caymisku ay ku guul-dareystaan inay u hoggaansamaan shuruudaha warbixinta ee uu qeexay sharcigan, waxay mutaysanayaan ganaax aan ka yarayn USD 10,000 (toban kun) doolarka mareykanka ama lacag shillin Soomaali u dhiganta.
2. Haddii daahitaanku dhaafo 10(toban) maalmood oo maalmo shaqo ah, Shirkadda Caymiska ama Hawl-wadeenka Caymiska, hadba sida ay xaaladdu tahay, waxa lagu ganaaxayaa USD 500 (shan boqol) oo doolarka mareykanka ama lacag shillin soomaali u dhiganta maalintiiba.
3. Haddii Shirkadda Caymisku ama Hawl-wadeenka Caymisku uu u hoggaansami waayo faqradaha (1) iyo (2) ee qodobkan, Bankigu wuxuu laali karaa shatiga muddada uu u arko inay ku habboon tahay ka dib marka uu ogeysiis qoraal ah siiyo shirkadda shatiga haysata.

## Qodobka 141aad
## Hadalo Been Abuur ah

Haddii shirkaddu siiso Bankiga macluumaad been abuur ah oo aan sax ahayn oo la xiriira ganacsiga Caymiska, Shirkadda Caymiska, ama howlwadeennada caymiska, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhanUSD 20,000 (labaatan kun) doolarka mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali u dhiganta.

## Qodobka 142aad
## Ku-xad-gudub Shuruudo Dib-u-Caymis

Shirkaddii u hoggaansami wayda qabanqaabada dib-u-caymiska ee lagu sheegay sharcigan waxay gelaysaa fal-dembiyeed ay ku mutaysanayso USD 20,000 (labaatan kun) doolarka mareykanka ama lacag shillin Soomaali u dhiganta.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 143aad
## Ku-noqoshada Xad-gudubyada

Shirkadda Caymiska ama Hawl-wadeenka Caymiska hadii ay ku celceliyaan jebinta shuruudaha sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa, Bankiga wuxuu ka joojin karaa shatiga isla markaana u diidi karaa inuu u cusboonaysiiyo.

## Qodobka 144aad
## Ku-xadgudub Shuruuco iyo Xeer-nidaamiyeyaal

Mar kasta oo shirkadda Caymiska ay u hoggaansami waydo qodobbada sharcigan, xeer- nidaamyada, habraacyada, awaamiirta, wareegtooyinka ama dukumentiyada kale ee muhiimka ah ee uu soo saaro Bankiga, waxaa la joojin karaa ama la burin karaa shatiga Caymiska, iyadoo la eegayo dabeecadda iyo culayska xadgudubka.

## Qodobka 145aad
## Shaacin Xog Qarsoon

Marka shaqaale rayid ah, xubin ka tirsan Guddiga Sare ee Shareecada, xubin ka tirsan Guddiga Shareecada ama shaqaale caymis ee shirkadda caymiska, uu bixiyo sir iyo macluumaad sir ah ama dukumentiyo la xiriira Shirkadaha Caymiska, Hawl-wadeenka Caymiska ama ganacsiga Caymiska guud waa in loo gudbiyo hay'adaha baarista iyo xeer- ilaalinta si dacwad ciqaabeed loogu soo oogo.

## Qodobka 146aad
## Bixin War Been Abuur Ah

Haddii ka-qeyb-qaataha ama xuquuqlaha uu sameeyo khiyaano isagoo soo gudbinaya macluumaad been ah si uu u helo magdhaw ama dhacdada uu khuseeyo Heshiiska Caymiska ay u dhacday ujeedadooda khaldan awgeed, ka-qeyb-qaataha iyo Xuquuqlaha keliya ma waayi doonaan xaqa lacag bixinta; arrinta waa in loo gudbiyaa hay'adaha sharciga iyo garsoorka si baaritaan dheeri ah loogu sameeyo oo loo dacweeyo.

## Qodobka 147aad
## Xad-gudubyada Shaqaalaha Dawladda

Haddii shaqaale dawladeed uu gacan ka geysto diyaarinta, ama uu oggolaado sheegashooyinka beenta ah iyo kuwa aan sal iyo raadka lahayn, dokumentiyada la xiriira sheegashadaas ama diiwaannada iyo warbixinnada maaliyadeed iyo hanti-dhawrka, ama warbixinnada la xiriira dhacdada isaga ama iyada waa laga joojinayaa xilka, waxaana loo gudbinayaa hay'adaha sharciga iyo garsoorka si loo sameeyo baaritaan la xiriirta eedeynta.

## Qodobka 148aad
## Warbixinno aan Sax ahayn

Haddii hanti-dhawraha, akjuweeriga, khasaare qiimeeyaha ama hawl-wadeennada kale ay u soo gudbiyaan warbixinno aan sax ahayn oo been abuur ah Bankiga, waxaa lagu ganaaxayaa lacag dhan USD 20,000 (labaatan kun) oo doolarka Maraykanka ah ama lacag shilin Soomaali u dhiganta, iyo soo-kabidda khasaarihii dhacay.

## Qodobka 149aad
## Ku Dhaqan-galka Shuruucda Kale

Xeerka Ciqaabta, Shuruucda Bankiyada, Shuruucda musalafnimada, Sharciga ka Hortagga Lacag-dhaqidda iyo Ladagaalanka Maal-gelinta Argagaxisada iyo kuwa kale ayaa ahaan doona kuwo lagu dabaqi karo dhammaan kiisaska jebinta sharcigan.

## Qodobka 150aad
## La-dagaalanka Lacag-dhaqidda iyo Ka-hortagga Maal-gelinta Argagaxisada

1. Shirkadda Caymiska, saraakiishiisa, shaqaalaheeda, wakiillada iyo bixiyeyaasha adeegga ee cid saddexaad ee dibadda laga soo diray waa inay had iyo jeer u hoggaansamaan qodobbada jira ee Ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo Ka-hortagga Maal-gelinta Argagaxisada (AML/CFT)
2. Shirkadda Caymiska waa inay:
    b) hirgeliso hababka aqoonsiga macmiilka si loo hubiyo aqoonsiga dhabta ah ee macmiilka iyo nooca ganacsigiisa;
    t) in la sameeyo habab ku habboon iyo tallaabooyinka xakamaynta

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

gudaha ee la-socodka macaamilka iyo dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee laga shakiyay;

in lagula xisaabtamo oo uu mas'uul ka yahay hoggaansanaanta wakiillada ee Shuruucda AML/CFT;

j) in ay horumariyaan barnaamijka u-hogaansanaanta AML/CFT ee ku habboon oo ay magacaabaan sarkaalka u-hogaansanaanta si loo hubiyo u- hogaansanaanta Shuruucda iyo Xeerarka AML/CFT;

x) in la siiyo tababarro joogto ah shaqaalaha iyo wakiillada si loo hubiyo in lagu war-geliyo isbeddelada cusub iyo lacagaha la dhaqay iyo farsamooyinka maal- gelinta argagixisada, hababka iyo isbeddelada;

kh) uga warbixiyaan Xarunta Warbixinta Maaliyadda macaamilada laga shakiyo ayadoo la raacayo tilmaamaha ay bixiso Xarunta Warbixinta Maaliyadeed; iyo

d) u soo gudbinta Bankiga warbixinnada loo baahan yahay sida uu Bankigu qeexi doono.

3. Bankigu waa in uu soo saaraa xeer-nidaamiye si Sharciga Ka-hortagga Lacag- dhaqidda iyo Ladagaalanka Maal-gelinta Argagaxisada ee caymiska loogu hirgeliyo arrimaha caymiska.

## Qodobka 151aad
## Xad-Gudubyada aan Lagu Xusin Sharcigan

1. Haddii Shirkadda Caymiska ama Caymiska-ku-shaqeeyuhu uu ku xad-gudbo qodobbada sharcigan, wakhtiga uu dhaqan-galka yahay, Xeer-hoosaadka, hab- raacyada la ansixiyay iyo arrimaha wareegtooyinka ama Sharciyada kale ee la dhaqan galiyay ee aan sheegin wax ciqaab ah xadgudubka noocaas ah, Bankigu wuxuu qaadi karaa mid ama in ka badan oo ka mid ah tallaabooyinka soo socda:
    a) talo qoraal ah si loo horumariyo Waxqabadka;
    b) digniin qoraal ah;
    c) laalista shatiga ilaa 45 maalmood; ama
    d) laallidda shatiga iyo u-gudbinta dacwadda garsoorka si baaritaan dheeri ah loogu sameeyo.
2. Bankigu waa inuu tixgaliyaa nooca, culayska iyo tirada xad-gudubyada uu sameeyo Caymiyuhu ama Hawl-wadeenka Caymisku.
3. Farqada (1) ee qodobkan, shirkadda caymiska ama howlwadeenka caymiska

wuxuu xaq u leeyahay in ay ka andacoon karaan go'aanka bankigu qaatay.

## CUTUBKA SAGAAL IYO TOBAN
## QODOBBO KAMA DAMBAYS AH

### Qodobka 152aad
### Xaddidaadda Shatiga

Shatiyada lagu bixiyo sharcigan waa inay ahaadaan mid aan la wareejin karin oo aan lagu meeleyn karin dad aan ahayn kuwa shatiga haysta.

### Qodobka 153aad
### Heshiiska Maal-gelinta

1. Caymiyuhu wuxuu la geli karaa heshiis maaliyadeed oo waafaqsan shareecada hay'adaha kale ee maaliyadeed.
2. Hay'adaha maaliyadeed ee ku xusan faqradda (1) ee qodobkan uma qalmaan inay shatiyo wakiilnimo iyo dillaal ka helaan Bankiga.

### Qodobka 154aad
### Isku-dhaca Danaha

Agaasimaha Guud, Agaasimeyaasha kale, Ku-xigeennada, Hanti-dhawrka iyo Mas'uuliyiinta Bankiga ma sameysan karaan Shirkad Caymis, balse waxay ka faa'iidaysan karaan gelintaanka adeegga.

### Qodobka 155aad
### Asaaska Ururada iyo Hay'adaha kale

Dadka danaynaya waxay asaasi karaan dalladda Shirkadaha Caymiska iyo Machadyada Tababarka Caymiska, waase haddii aanay sinaba u wiiqayn bixinta Caymiska.

### Qodobka 156aad
### Awoodaha Bankiga ee Soo-saarista Xeer-nidaamiyayaal

1. Si loo dhaqan-geliyo sharcigan, Bankigu wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiyeyaaal, wareegtooyin, xeer hoosaadyo iyo habraacyo.
2. Bankigu waa inuu daabacaa dhammaan dokumentiyada lagu soo saaray farqada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(1) ee qodobkan oo uu dib-u-eegis iyo cusboonaysiin ku samaynayo marka loo baahdo.

3. Bankigu, isagoo ogaysiis ku soo saarayo faafinta rasmiga ah, wuxuu ka dhaafi karaa qof ama koox dad ah dhammaan ama mid ka mid ah qodobbada sharcigan muddadaas oo ay ku xiran yihiin shuruudaha uu bankigu cayimi karo.
4. Bankigu waa kala tashan karaa daneeyayaasha ceymiska hadii uu u arko muhiim.

## Qodobka 157aad
## Baabi'in

Sharcigaan wuxuu baabi'inayaa dhammaan sharciyadaan hoos ku xusan:

1. Sharci Lr.69 ee 30 Sept 1972, oo ah sharcigii lagu asaasay hay'addii Caymiska Qaranka, oo dowladdu lahayd (sharcigaasi 'private sector' uma oggolayn inay bixiyaan adeegga caymiska).
2. Sharci Lr 20 ee 15ka January 1973, oo ah shircigii waajibka (compulsory) looga dhigay caymiska Baabuurta ee loo yaqaan (third party motor insurance).
3. Sharci Lr. 8 ee 26ka January 1989 waxaa la fasaxay in adeeg caymis oo gaar loo leeyahay (private sector insurance service) la samaysan karo.

## Qodobka 158aad
## Dhaqan-galka Sharcigan

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS, Madaxweynuhuna saxiixo isla markaasna lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.